# SIYAASADDA HORUMARINTA WAXBARASHADA GABDHAHA

WASAARADDA WAXBARASHDA, HIDDAHA IYO TACLIINTA SARE EE DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**Daabacaadda Labaad**

**2025**

# SIYAASADDA HORUMARINTA WAXBARASHADA GABDHAHA

WASAARADDA WAXBARASHADA,
HIDDAHA IYO TACLIINTA SARE EE
DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**Daabacaadda Labaad**

**2025**

# Tusmo

| | |
|---|---|
| **Gogoldhig** | **iii** |
| **Arar** | **V** |
| | **vi** |
| **Mahadnaq** | **viii** |
| **Ereyada Lasoo Gaabiyay** | |
| **1. Hordhac** | **3** |
| **2. Falanqaynta Xaaladda Waxbarashada Gabdhaha** | **4** |
| **3. Himilada, Hawlgalka iyo Mabaadi'da Siyaasadda Hagaya** | **7** |
| **4. Qaabdhismeedka Siyaasadda iyo Sharciga** | **10** |
| **5. Helitaanka Waxbarasho Xaqsooran oo Loo Dhan Yahay** | **13** |
| **6. Tallaabooyinka iyo Hawlaha Hirgelinta Guulaysata** | **17** |
| **7. Arrimaha Isa-suran** | **20** |
| **8. Abaabulka Khayraadka, Qoondaynta iyo Joogtaynta** | **25** |
| **9. Dukuminti Maguuraan ah** | **26** |
| **10. Qaabdhismeedka Hirgelinta** | **28** |
| 10.1 Qaabdhismeedka Hay'adaha | 28 |
| 10.2 Doorka iyo Mas'uuliyadaha Daneeyayaasha | 29 |
| **11. Qaabdhismeedka Hirgelinta Siyaasadda (2025-2029)** | 30 |
| **12. Kormeerka iyo Qiimaynta** | **38** |
| **13. K&Q Siyaasadda (2025-2029)** | **39** |

# Gogoldhig

Waxbarashadu waa asaaska dhismaha horumarka waara, isku-duubni bulsho iyo baraaraha qaranka. Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay garwaaqsan tahay in maalgelinta waxbarashadu– gaar ahaan tacliin tayaysan oo xaqsooran– ay tahay tallaabo dardargelisa kobaca dhaqaalaha, isbeddelka bulshada iyo xasilloonida mustaqbalka fog. Inkasta oo horumar baaxad leh laga gaaray dhanka ballaarinta helitaanka waxbarashada, haddana sinnaan la'aanta jinsigu waa caqabad culus oo weli taagan, islamarkaana ku hor gudban fursadihii gabdhaha iyo haweenku ay heli lahaayeen, si ay si buuxda ugu baraarugaan kartidooda iyo hibadooda.

Dowladda Federalka Soomaaliya oo ay wakiil uga tahay Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare(WWH&TS), waxaa si weyn uga go'an abuuridda nidaam waxbarasho loo dhan yahay, islamarkaana xaqsoor iyo adkaysi leh. Go'aan kan waa mid si rasmi ah ugu qeexan Siyaasadaha Qaranka islamarkaana dib loogu sii adkeeyay habraacyada caalamiga ah sida Ajandaha 2030 ee Horumarka Waara. Inkasta oo horumar laga sameeyay yaraynta sinnaan la'aanta jinsiga ee ka jira waxbarashada hoose/dhexe, haddana dheelligu waa mid weli ka taagan heerarka waxbarashada dugsiga sare, farsamada iyo tacliinta sareba, waxaana sii cakiray caqabadaha dhaqan-dhaqaale, caada-dhaqameedyada, guurka xilliga hore iyo walaaca xaaladda amniga ee Dalka. Caqabadahan isbiirsaday waxay weli carqalad ku yihiin hammiga waxbarasho ee malaayiin gabdho Soomaaliyeed.

Iyada oo laga jawaabayo caqabadahan, Siyaasadda Waxbarashada Gabdhaha ee Qaranka ayaa markii ugu horreysay miiska la soo saaray sanadkii 2020, taasoo ahayd hannaan istiraatiijiyadeed oo looga gol leeyahay in sare loogu qaado waxbarashada gabdhaha. Dibu-eegista siyaasaddan ee sanadka 2025 waxay ka turjumaysaa soo-rogaalcelinta qorshaha Dowladda Soomaaliya ee ku aaddan horumarinta waxbarashada gabdhaha, maaraynta duruufaha ku gadaaman, iyo sidoo kale in lagu daro hortabinta qaranka iyo halbeegyada waxbarasho ee heer gobol ilaa heer caalami.

Dibu-eegistani waxay ku soo beegantay xilli aad muhiim u ah oo ay Soomaaliya ku hawlan tahay dibuqaabayn waxbarasho oo laxaad leh taas oo qayb ka ah Qorshaha Isbeddelka Qaranka (2025-2029), iyo Siyaasadda Waxbarashada Qaranka (2024). Annaga oo u marayna xoojinta iskudhafnaanta jinsiga ee saaxadda waxbarashada, hadafkeennu wuxuu yahay in aynu meesha ka saarno caqabadaha islamarkaana kordhinno heerka ku negaaanshaha iyo gabagabaynta waxbarashada ee ardayda, islamarkaasna aynu abuurno degaan nabdoon oo ay ardaydu—iyaga oon jinsigooda loo eegayn—awood u leeyihiin in ay helaan waxbarasho tayaysan iyo fursado aqooneed joogta ah.

Hantida ugu weyn ee Soomaaliya waa cududda dhallinyarada iyo bulshada qaybaheeda kala duwan. Waa waajib in aynu ka faa'iidaysanno fursaddan dihan annagoo u maraynna hubinta in gabdhaha iyo wiilashu, labaduba u siman u yihiin helitaanka waxbarasho iyo fursado ay ku hanaqaadaan. Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhuhu waa qaabdhismeed nagu hagaya rumaynta riyadan, waxayna hoosta ka xariiqaysaa dadaalka aan hagarta lahayn ee aan ku doonayno in aynu ku burburinno meertada sinnaan la'aanta iyo awood-u-siinta guud ahaan ardaydu in ay kaalin muuqata ka qaataan horumarinta qaranka.

Waxa aan xoojinayaa in dhammaan daneeyayaasha Siyaasaddan ay si wadajir ah uga shaqeeyaan hirgalinteeda. Innaga oo isku-duuban waxaan waxbarashada Soomaaliya ka dhigi karnaa mid tayo leh, loo dhan yahay, una diyaarsan mustaqbalka.

**Mudane Faarax Sheekh Cabdulqaadir**
Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha Iyo Tacliinta Sare,
ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.

# Arar

Dowladda Fedaraalka Soomaaliya waxaa ka go'an in ay sinto fursadaha dhanka waxbarashada ragga iyo dumarka, wiilasha iyo gabdhaha. Go'aankani wuxuu salka ku hayaa heshiisyada caalamiga ee ay Soomaaliya saxiixday. Sidaa darteed, markii Golaha Guud ee Qaramada Midoobay uu 2012-ki ku waajibiyay 195 waddan oo caalamka ah, oo ay Soomaaliya ku jirto, in ay si degdeg ah wax uga qabtaan baahiyaha dadkooda, carruurta iyo qoysaska iyadoo loo marayo Yoolalka Horumar Waara (SDGs), Soomaaliya waxa ay go'aansatay in ay si geesinimo leh uga shaqayso horumarinta tiirarkii lagu saleeyay Yoolalkii Horumarinta Kun-Sannadlaha (MDGs). 17-ka yool ee SDGs oo ay 2015-ki ansixiyeen hoggaamiyayaasha caalamku, waxaa ka mid ahaa labo qodob oo muhiim ah oo kala ah: tayada waxbarashada iyo sinnaanta waxbarashada jinsiga.

Dowladda Fedaraalka Soomaaliya iyada oo ogsoon caqabadaha ka jira helitaanka waxbarasho tayo leh iyo sinnaan la'aanta jinsiga ee dhinacyada diiwaangalin, joogtaynta/haynta iyo dhammaystirka waxbarashada, waxay waajibisay dejinta Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhaha ee Qaranka (2020), taasoo dib-u-eegis lagu sameeyay 2025 si loo dardargeliyo waxbarasho tayo leh, korna loogu qaado waxbarashada gabdhaha. Ujeeddada ugu weyn ee siyaasaddan ayaa ah in la xaqiijiyo u sinnaanta waxbarashada dhammaan heerarkeeda kala duwan. Si loo gaaro yoolalka SDGs ee 4aad iyo 5aad ee ku saabsan tayada waxbarashada iyo sinnaanta jinsiga kolka la gaaro sanadka 2030, waxaa loo baahday siyaasad wax ka qabanaysa waxbarashada gabdhaha heerarkeeda kala duwan, taasoo horseedday dib-u-eegista siyaasaddan.

Xeerarka Dhaqangelinta Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhaha waxay diiradda saarayaan arrimaha asaasiga ah ee lagu dhimayo farqiga waxbarasho ee u dhexeeya wiilasha iyo gabdhaha, iyada oo la adeegsanayo hannaan waafaqsan tijaabooyinka taabbagalay ee caalamiga ah, kuwaasoo suurtagelinaya in siyaasaddan gudaha Soomaaliya laga dhaqangeliyo. Xeerarka hirgelinta wuxuu xoogga saarayaa waxbarashada gabdhaha isaga oo adkaynaya nidaamyada hay'daha, geeddisocodka shaqada, awoodda khayraadka iyo islaxisaabtanka.

Dhammaan hay'daha fulinta, oo ay ka mid yihiin Dawladaha Xubnaha ka ah Dowladda Fadaraalka Soomaaliya, iyo bahwadaagta horumarinta waxbarashada waa inay si qoto dheer u hirgaliyaan Siyaasaddan.

**Xasan Maxamed Cali**

Xooghayaha Joogtada ah ee Wasaaaradda Waxbarshada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Dawladda Federaalka Soomaaliya.

# Mahadnaq

Siyaasaddan waa guul muhiim ah oo ay gaartay Wasaaaradda Waxbarshada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, horumarinteeda iyo dib-u-eegisteedu ma aysan suurtagasheen haddii aysan jirin taageerada muhiimka ah iyo dedaallada kaladuwan ee daneeyayaasha waxbarashada.

Wasaaaradda Waxbarshada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare, waxa ay u mahadnaqaysaa dhammaan mas'uuliyiinta iyo bahwadaagta waxbarashada, gaar ahaan Wasaaradaha Waxbarashada ee dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Fedaraalka, Maamulka Gobalka Banaadir, iyo daneeyayaasha kala duwan ee sida firfircoon uga qaybqaatay dib-u-eegista, horumarinta, ansixinta iyo fulinta Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhaha. Dadaalkooda iyo wadashaqayntooda ayaa qayb lixaad leh ka qaatay qaabaynta siyaasaddan si loo xaqiijiyo in dhammaan ardayda Soomaaliyeed helaan waxbarasho tayo leh, loo wada dhan yahay, oo joogto ah.

Wasaaradda Waxbarashada waxa ay qiraysaa kaalinta muhiimka ah ee dhammaan dhinacyada kala duwan ay qaateen. Sidoo kale, kooxaha farsamada, agaasimayaasha, lataliyayaasha, guddigga waxbarashada, iyo wakiillada ururrada aan dowliga ahayn, ee sida hagar la'aanta ah uga qaybqaatay Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhaha.

# Ereyada Lasoo Gaabiyay

| | |
|---|---|
| **YHW** | Yoolasha Horumar Waara |
| **WWHT&TS** | Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha, iyo Tacliinta Sare |
| **QIQ** | Qorshaha Isbeddelka Qaranka |
| **WDC** | Waxbarashada Da'da Carruurnimada |
| **DIDM** | Dugsiyada Iskudhafka Diiniga iyo Maaddiga |
| **BXWS** | Buugga Xogta Waxbarashada Sannadlaha |
| **HTS** | Hay'adda Tayadhowrka Soomaaliyeed |
| **NK&MXW** | Nidaamka Kaydinta & Maamulidda Xogta Waxbarashada |
| **NK&MXTS** | Nidaamka Kaydinta & Maamulidda Xogta Tacliinta Sare |
| **WFTX** | Waxbarashada Farsamada iyo Tababarka Xirfadeed |
| **WS** | Waxbarashada Sare |
| **TS** | Tacliinta Sare; |
| **WAD** | Waxbarashada Asaasiga ee Degdegga ah; |
| **XXJ** | Xadgudubka Xagga Jinsiga; |
| **WWDXF** | Wasaaradaha Waxbarashada ee Dowlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka ; |
| **MGB** | Maamulka Gobolka Banaadir; |
| **SWG** | Siyaasadda Waxbarashada Gabdhaha; |
| **WG** | Waxbarashada Gabdhaha; |
| **DS** | Dugsiga sare; |
| **WLDY** | Waxbarashada Loo Dhan Yahay |

# Qaybta Koowaad 01

1. HORDHAC
2. FALANQAYNTA XAALADAHA WAXBARASHADA GABDHAHA
3. HIMILADA, HAWLGALKA IYO MABAADI'DA SIYAASADDA HAGAYA
4. QAABDHISMEEDKA SIYAASADDA IYO SHARCIGA

# 1 HORDHAC

Soomaaliya waxa ay ku jirtaa dibuqaabayn waxbarasho oo dhammaystiran, taas oo qayb ka ah dadaalladeeda ballaaran ee dibudhiska qaranka, kaddib sodan sano oo colaado ragaaddiyeen. Iyada oo garowsan in waxbarashadu tahay asaaska sookabashada qaranka, iskuxirka bulshada, iyo horumarinta dhaqaalaha, WWHT&TS, oo matalaysa DFS waxay u diyaarsan tahay taabbagelinta nidaam waxbarasho oo adkaysi leh, loo wada dhan yahay, oo xaqsooran, kaas oo xaqiijinaya in dhammaan dadka Soomaaliyeed helaan fursado waxbarasho oo tayo leh, iyada oon loo eegin jinsiga iyo heerka dhaqan-dhaqaale.

Ummad waxbaratay waa tiirdhexaadka kobcinta horumarka waara iyo xasilloonida bulshada. Khayraadka ugu weyn ee Soomaaliya haysato waa da’yarteeda iyo karaanka aadanaha oo kala duwan. Si kastaba ha ahaatee, sinnaan la’aanta waxbarashada jinsiga ee guud ahaan dalka ka jirta ayaa weli carqaladaynaysa in la sii wado horumarka wanaagsan. Inkastoo wiilasha iyo raggu inta badan ka faa’iidaystaan fursadaha waxbarasho iyo kuwa shaqo si ka ballaaran tan gabdhaha iyo haweenka kuwaas oo weli la tacaalaya caqabado isbarkan, oo ay ka mid yihiin caadooyin dhaqameed, duruufo dhaqaale, iyo xaaladdo amni, kuwaasoo is-hortaaga in gabdhuhu helaan waxbarasho, joogteeyaan islamarkaana si guul leh uga aflaxaan.

Si wax looga qabto sinnaan la’aanta waxbarashada jinsiga, Soomaaliya waxay hortebisay waxbarashada gabdhaha oo lafdhabar u ah istaraatiijiyadda dib-u-dhiska qaranka. Dowladda Soomaaliya waxa ay anisixay heshiisyo caalami ah, waxayna dejisay siyaasado iyo hannaano loogu talagalay kor-u-qaadista waxbarashada gabdhaha, iyo hubinta fursado waxbarasho oo loo dhan yahay. Inkastoo dadaalladaasi jiraan, haddana waxaa weli caqabad ah farqiga ka jira xagga diiwaangalinta ardayda, joogtaynta waxbarashada, iyo tirada ardayda waxbarashada dhammeysta, taas oo muhiim ka dhigaysa sameynta faragelin gaar ah, si loo damaanad qaado in dhammaan ardaydu helaan waxbarasho xaqsooran islamarkaana gaaraan natiijooyin miradhal ah.

Qodobka 30aad ee Dastuurka Qaranka Soomaaliya, wuxuu dhigayaa in waxbarasho asaasi ah, loo dhan yahay, lacag la’aan ah, ay tahay xaq asaasiga ah oo uu muwaadin kastaa leeyahay. Inkasta oo sinnaan la’aanta wiilasha iyo gabdhaha ee waxbarashada hoose/dhexe ay u muuqato inay sii yaraanayso, haddana waxaa farqi weyn ka jiraa heerarka kale sida ardayda dugsiga sare, joogtaynta waxbarashada, iyo boqollayda dugsiyada ka qalinjebisa. Arrimo ay ka mid yihiin dhaqaalo yari, guurka gabdhaha da’ada yar, mudnaansiinta wiilasha, amni-darrada, caadooyin dhaqameed, iyo musiibooyinka dabiiciga ah ayaa weli xagaldaacinaya dadaallada lagu gaari lahaa waxbarasho xaqsooran. Saamiga carruurta aan dugsiyada dhigan ayaa hoos uga dhacay 77% (EMIS, MoECHE, 2018) una dhacay 66.2% (EMIS, MOECHE, 2023), taas oo yareysay caqabadihii la xariiray diiwaangalinta iyo joogtaynta waxbarashada. Dhanka kale, boqollayda dadka wax akhriya waxna qora oo aheyd 40% (NBS, 2016), ayaa gaartay 53.7% (NBS, 2022), inkasta oo koror ay muujinayso, haddana weli waa mid hooseysa.

Dib-u-eegista Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhaha ayaa noqotay mid lamahuraan ah si loo daboolo doldaloolooyinkaloona hubiyo in dhammaan ardayda— wiilasha iyo gabdhaha, ragga iyo dumarka— ay gaaraan hanka ugu sareysa karaankooda. Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhaha ayaa dib-u-eegis dhammaystiran lagu sameeyay sanadka 2025.

Dib-u-eegistan waxaa gundhig u ah dhawr arrimood oo muhiim ah oo ay ka mid yihiin: b) danaynta sii kordhaysa ee waxbarashada gabdhaha iyo u-qareemidda ku aaddan waxbarasho loo dhanyahay; t) caqabadaha weli taagan sida khataraha amni, duruufaha dhaqaale iyo caadooyin-dhaqameedka saameeya waxbarashada gabdhaha; j) dib-u-eegista siyaasadaha iyo qorshayaasha haga waxbarashada sida Siyaasadda Waxabarashada Qaranka (2024) iyo Qorshaha Isbedelka Qaranka (2025-2029), kuwaasoo lagama maarmaan ka dhigaya in la waafajiyo hortebinnada waxbarashada dalka ah iyo kuwa caalamiga ah.

Hadafka ugu weyn ee siyaasaddan waa in la ciribtiro sinaan la'aanta jinsiga ee waxbarashada, iyadoo la xaqiijinayo in dhammaan dadka Soomaaliyeed si siman u helaan waxbarasho tayo leh. Dib-u-eegista siyaasadda 2025 waxay hiigsanaysaa in la dardargeliyo waxbarashada gabdhaha, laga jawaabo dhibaatooyinka soo ifbaxay, iyo in la abuuro jawi oggolaanaya in dhammaan ardayda Soomaaliyeed ay si siman u helaan ugana faa'iidaystaan waxbarasho tayaysan.

Ugu dambayntii, ajandaha 2030-ka ee Horumarka Waara, iyo Qorshaha Isbeddelka Qaranka Soomaaliyeed (2025-2029) iyo, sidoo kale, Qorshaha Horumarinta Waxbarashada (2022-2026) waxaay y xoojinayaan baahida loo qabo ciribtirka sinnaan la'aanta jinsiga ee waxbarashada, taasoo ah xuquuqda asaasiga ah iyo tubta lagu gaaro waxbarasho xaqsooran. Si loo xaqiijiyo hadafkan, Dawladda Soomaaliya waa inay hubisaa nidaamkeeda waxbarasho in uu kobciyo sinnaanta isagoo meesha ka saaraya caqabadaha, dhiirrigelinaya joogtaynta waxbarashada, islamarkaana awoodsiinaya dhammaan ardayda. Sidaas darteed, siyaasaddani waxay u dhisan tahay qaab-dhismeed istaraatiiji ah oo lagu gaari karo sinnaanta waxbarashada, iyo xaqiijinta in nidaamka waxbarashada Soomaaliya uu yahay mid loo wada dhanyahay lana jaanqaadi kara mustaqbalka.

# 2 FALANQAYNTA XAALADAHA WAXBARASHADA GABDHAHA

Intii lagu gudajiray taabbagelinta Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhaha (2020) iyo Qorshaha Horumarinta Waxbarashada (2022-2026), waxaa soo baxday in caqabadaha hortaagan waxbarashada gabdhuhu aysan ku koobnayn heerka waxbarashada asaasiga ah, balse sidoo kale ay ka jiraan waxbarashada heerarka sare. Waxaa sidoo kale la ogaaday in sinnaan la'aanta waxbarashada ee ka jirta heerka waxbarashada asaasiga ah, ay saamayn taban ku yeesheen tacliinta sare. Sidaas darteed, waxaa soo if-baxday baahida loo qabo in la ballaariyo baaxadda siyaasadda jirta si wax looga qabto arrimaha ka taagan heerarka kale ee waxbarashada.

Ujeeddada dib-u-eegista siyaasaddan ayaa ah in la go’aamiyo heerka fulinta Siyaasadda Waxbarashada Gabdhaha (2020), iyada oo diiradda la saarayo helitaanka, joogteynta, u gudbidda heerarka kale iyo dhammeystirka waxbarashada. Qodobbada kale ee dib-u-eegista lagu sameeyay waxaa ka mid ah, maalgelinta iyo qoondaynta miisaaniyadda, heerka kaqaybgalka bulshada, guulaha la gaaray iyo, sidoo kale goldaloolooyinka ka jira dadaallada fulinta.

Inkasta oo horumar laga sameeyay helitaanka waxbarashada, haddana farqiga u dhexeeya labka iyo dhediga ayaa weli ka muuqda heerarka kala duwan ee waxbarashada. Ciribtirka sinnaan la’aantaas, waxay xaqiijineysaa in waxbarashadu noqoto mid si siman u heli karaan, ugana faa’iidaysan karaan dhamaan dadka Soomaaliyeed.

## 2.1Waxbarashada Asaasiga ah

### 2.1.1 Waxbarashada Xannaanada Caruurta

Waxbarashada Xannaanada Carruurta (*ECE)* ama Dugsiyada Iskudhafka Diiniga iyo Maaddiga (*IQS*) oo ay dhigtaan 3% carruurta gaartay da’da waxbarashada ayaa intooda badan ka diiwaangashan goobo waxbarasho oo gaar loo leeyahay (EMIS, 2023). Hase ahaatee, WWHTS waxa ay hadda dhiirrigalinaysaa horumarinta xarumaha Waxabarashada Xanaanada Carruurta (*ECE/IQS*) ee bulshada, waxayna hirgelisay manhaj loogu talaggalay ardayda da’doodu u dhaxayso 4-6 sano.

Maadaama xogta laga hayo heerkan waxbarasho ay tahay mid kooban, welina aan la samayn xog-ururin heer qaran ah, waa ay adag tahay in la oddoroso saamaynta fog ee waxbarashada gabdhaha. Si kastaba ha ahaatee, waxaan dhihi karnaa sinnaan la’aanta dhanka jinsiga ah ee heerkan waxbarasho ma noqonayso mid aad u weyn haddii laga tusaale qaato in carruurta da’daan jirta la geeyo dugsiyada Qur’aanka ayadoon loo eegin lab iyo dheddig.

### 2.1.2 Waxbarashada Hoose/Dhexe

Waxbarashada hoose/dhexe waxaa ku yimid kobac, iyadoo ay is-qoristu gaartay 33% sanadkii 2023-dii. Si kastaba, weli waxaa jira caqabado waaweyn oo ay ka mid yihiin hoos u dhaca heerka joogtaynta waxbarashada, sinnaan la’aanta labka iyo dheddiga iyo helitaanka bay’o waxbarasho tayo leh. Heerka Isdiiwaangelinta Guud (*GER*) ee ardayda dugsiga hoose/dhexe waxay maraysaa 33.8%, halka ay 37.6% wiilal yihiin, gabdhuhuna 30.1%, tan oo muujinaysa farqiga jira ee u dhexeeya labka iyo dheddiga.

Heerka Diiwaangelinta Rasmiga ah (*NER*) waa mid weli hooseeya oo maraya 30%, kaas oo ay gabdhuhu ka yihiin 27.1% halka ay wiilashuna ka yihiin 33%. Inkasta oo ay wadarta guud ee gabdhaha ka diiwaangashan dugsiga hoose/dhexe ay noqonayaan 44.8%. Farqigan ayaa ah mid weli la yarayn la'yahay, islamarkaana adkeynaya helitaanka iyo kaqaybgalka waxbarashada ee gabdhaha. (EMIS, 2023)

Joogtayn la'aanta waxbarashada ee ardayda ayaa ah caqabad joogta ah. Celceliska ardayda gaara fasalka 5-aad ayaa ah 25% oo keliya, gabdhaha ayaana inta ugu badan dhex uga taga dugsiga hoose/dhexe sababo ay ka mid yihiin: caqabado dhaqameed, duruufo dhaqaale iyo guurka gabdhaha da'ada yar. (EMIS, 2023)

Mid ka mid ah arrimaha waaweyn ee saamaynta ku leh tayada waxbarashada dugsiga hoose ayaa ah tirada macallimiinta tababaran oo aad u kooban. Haatan, 68% macallimiinta dugsiga hoose/dhexe ayaa buuxiyay halbeegyada u qalmidda macallinnimo, sidoo kale Saamiga Arday-Macallin (*PTR*) ayaa ah 46:1, halka uu Saamiga Arday-Macallin Tababaran (*QPTR*) uu yahay 67:1. Dhanka kale, tirada guud ee macallimiinta dheddigga ah ee ka hawlgala goobaha waxbarashada aasaasiga ah, ayaa ah 14% oo qura, tan oo ka horjoogsaneysa kaalintii ku dayashada . Wax-ka-qabashada daldalooladan ayaa muhiim u ah horumarinta miradhalka waxbarashada iyo abuuridda degaan ay ardaydu ku baraari karaan. (EMIS, 2023)

#### 2.1.2 Waxbarashada Dugsiga Sare

Diiwaangelinta waxbarashada gabdhaha dugsiga sare ayaa weli ka hoosaysa tan wiilasha, iyada oo sinnaan la'aanta ardayda labka iyo dheddigu ay ku sii xoogaysanayso fasallada dambe ee dugsiga sare. Fasallada hoose ee dugsiga sare (F9 – F10), gabdhuhu waxay 43.1% ka yihiin wadarta guud ee diiwaan galinta, laakiin tiradaas ayaa hoos uga dhacda 40.7% marka la gaaro fasallada sare (F11–F12), taasoo muujinaysa hoos u dhaca ka mid ahaanshaha gabdhaha ee horumarka ardayda *(EMIS*, 2023).

Tirada gabdhaha dugsiyada ka tagaya ayaa weli aad uga sarreeya kan wiilasha, iyada oo heerka ka tegitaanka gabdhaha ee fasallada hoose ee dugsiga sare uu gaarayo 8.3%, halka wiilasha marka loo eego ay yihiin 6.1%. Sidoo kale boqolleyda gabdhaha fasallada sare ee dugsiga ka haraya ayaa sii kordhaysa iyadoo gaaraysa 12.6%, halka wiilasha ay gaarayaan 9.2% *(EMIS*, 2023).

Farqiga labka iyo dheddigga ee waxbarashada dugsiga sare ayaa weli ah duruuf ay Soomaaliya la daalaadhacayso, iyadoo macallimiinta haweenka ah ay si weyn ugu yaryihiin, waxaana ay ka kooban yihiin oo kaliya 11% guud ahaan macallimiinta dugsiga sare. Maqnaanshaha macallimiinta haweenka ah waxa ay si gaar ah u xaddidaysaa fursadaha gabdhaha ee hagista iyo dhiirrigelinta gudaha dugsiyada, waxa ayna sidoo kale door ka qaadaneysaa farqiga jinsiga ee helitaanka, siiwadista, iyo horumarinta tacliinta. Inkasta oo ay socdaan dadaallo lagu xoojinayo waxbarasho xaqsooran, joogitaanka yar ee haweenka barayaasha ah ayaa weli hortaagan in la abuuro jawi waxbarasho oo ardaydu u siman yihiin.

**2.1.2 Waxbarashada Farsamada, Tababarrada Xirfadaha (*TVET*) iyo Waxbarashada Dadka Waaweyn**

Waxbarashada Farsamada iyo Tababarrada Xirfadaha (*TVET*) ee Soomaaliya ayaa si tartiib ah u kobcaysa, iyadoo guud ahaan tirada ardayda ee is diiwaangelisay dalka oo dhan ay cagacagaysay 22,995. Si kastaba ha ahaatee, waxaa weli ka muuqata sinnaan la'aan baahsan oo xagga jinsiga ah, maadaaama diiwaan gelinta labka oo ah 58.4% ay aad uga sarrayso tan dheddigga oo ah 41.6%, taasoo muujinaysa in fursadaha gabdhaha ee ka qaybgalka waxbarashada xirfadaha iyo farsamadu ay xaddidan tahay.

Iyada oo ay sii kordhayso baahida loo qabo shaqaale xirfad leh, kaqaybgalka hooseeya ee tirada dheddigga ah ayaa tilmaamaya in ay jiraan caqabado, kuwaas oo ay ka mid yihiin yaraanta xarumaha TVET ka, duruufo dhaqaale iyo caadooyin bulsheed oo gabdhaha ka niyadjebinaya inay ka faa'iidaystaan waxbarashada farsamada iyo tababarka xirfadaha. Ballaarinta barnaamijyada tababarrada xirfadaha ee ka jawaabaya baahiyaha gabdhaha iyo xoojinta xarumaha *TVET* ka ayaa muhiim u ah in dhallinyarada, gaar ahaan gabdhaha, la baro xirfado ay ku shaqaystaan islamarkaana la dhimo farqiga xirfadeed ee ka jira suuqa shaqada.

Wadarta guud ee heerka akhris-qoraalka ee Soomaaliya wuxuu marayaa 53.7%, waxaana jira farqi ballaaran oo u dhexeeya labka iyo dheddigga, iyo, sidoo kale, gobollada kala duwan. Heerka akhris-qoraalka ee ragga ayaa ah 63.6%, halka kan dumarku yahay 45.3%, arrintaas oo muujinaysa sinaan la'aanta weli ka jirta fursadaha waxbarashada iyo barnaamijyada akhris-qoraalka ee la heli karo. (*NBS*, 2022).

**2.1.2 Tacliinta Sare**

Waxbarashada tacliinta sare ee Soomaaliya waxaa ka diiwaangashan arday gaaraysa 239,786, kuwaas oo inta badan dhigta goobo waxabarasho oo gaar loo leeyahay marka loo barbardhigo kuwa dawliga ah. Hase yeeshee, farqiga xagga jinsiga ah ayaa weli ka muuqda, ardayada labka ayaa ah 74% wadarta guud ee diiwagashan, halka ay ardayda dumarka ka yihiin 26%, taas oo muujineysa xaddidnaan helitaanka Waxbarashada Sare. (*HEMIS, 2023*).

# 3 HIMILADA, HIIGSIGA IYO MABAADI'DA SIYAASADDA

Siyaasaddani waxa ay ku qotontaa mabaadi'da iyo qaayasoorrada Dastuurka Soomaaliya iyo Siyaasadaha Qaranka ee sare-u-qaadidda waxbarashada gabdhaha ee dhammaan heerarka kaladuwan ee dhinaca waxbarashada, si ay u buuxiyaan xeerarka, dhaqangelinta xaqsoorka iyo in bulshadu u wada dhan tahay. Siyaasaddan waxaa saldhig u ah arrimaha soo socda:

1. Hirgelinta degaan waxbarasho oo ammaan ah kaas oo loogu talaggalay horumarinta guud ee ardayda ku jirta dhammaan heerarka kala duwan ee waxbarashada.
2. Ballanqaadidda waxbarasho asaasi oo lacag la'aan iyo waajib ah, islamarkaana ay dhammaan xaq u leeyihiin ardaydu, iyada oo aan loo kala saarayn lab iyo dheddig ama heer dhaqaale.
3. Diyaarinta bay'o waxbarasho oo badqabta kuna habboon dhammaan ardayda.
4. Bixinta waxbarasho tayo leh taas oo ardayda siinaysa asaasiyaadka looga baahan yahay si ay ugu gudbaan heerka sare ee tacliinta iyo iskufilnaanta bulshada dhexdeeda.
5. In nidaamka waxbarashada lagu daro tignoolajiyad iyo fursado waxbarasho oo loo dhanyahay, si loo suuragaliyo qaabab waxbaris oo isugu-dhafan fasallo la xaadiro iyo fogaan-arag, taas oo ay guud ahaan ardaydu ku qaadanayaan degaan ka caaggan faquuq iyo fowdo.
6. Joogtaynta kormeeris iyo qiimayn caddaymo cuskan oo lagu sameeyo fulinta Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhaha.
7. Hay'adaha kala duwan ee dowladda Soomaaliya waxa ay aqoonsan yihiin oo ay gudanayaan waajibaadka ka saaran bixinta waxbarashada iyo badqabka ardayda heer kasta oo ay yihiin ayada oo fulinteeda loo mari doono diyaarinta deegaan ku habboon oo uu si dhow ardaygu ula qabsan karo.
8. Awoodsiinta iyo dib-u-habaynta qaabdhismeedkii horay u jiray, iyada oo looga danleeyahay in si wax-ku'ool ah loo ilaaliyo heerarka kala duwan ee guud ahaan ardayda wax baranaysa iyadoon loo fiirinayn lab iyo dhaddig iyo nuglaansho.
9. Wacyigelinta bulshada arrimaha la xiriira caadooyinka iyo qiyamka bulshada iyo raadaynta ay ku leeyihiin doorarka labka iyo dhaddigga, iyo, sidoo kale, qaabka ay u saameeyaan guulaha waxbarasho ee ardayda.
10. Qaadista tallaabooyin wax ku'ool ah si loo yareeyo farqiga u dhexeeya wiilasha iyo gabdhaha dhanka fursadaha waxabrashada sida ardayda baahiyaha gaarka qaba (*CWD*), barakacayaasha, agoonta, reer-guuraaga, iyo kuwa ay saameeyeen musiibooyinka dabiiciga ah ama ay dadku sababeen.

## 3.1HIMILADA IYO HIIGSIGA SIYAASADDA

**Himilada**

Helista waxbarasho tayo leh, caddaalad ah, loona dhan yahay dhammaan heerarkeeda kala duwan

**Hiigsiga**

Dardargelinta ka wada qayb-noqoshada bulshada ee fursadaha waxbarasho ee gabdhaha iyada oo si wanaagsan loo hirgelinayo heerarka kala duwan ee waxbarashada.

### 3.2 Yoolka Siyaasadda

Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhaha, waxa ay hiigsanaysaa dejinta qaab-dhismeedyo guud oo ay wehliyaan xeeladihii lagu fulin lahaa, si loo hubiyo in loo siman yahay helitaanka waxbarasho loo wada dhan yahay oo tayo leh, isla markaana dhiirigelineysa dhammaan ardayda – wiilal iyo gabdho, rag iyo dumarba – guud ahaan heerarka tacliinta, iyada oo si gaar ah diiradda loo saarayo sii-joogtaynta iyo dhammeystirka waxbarashada ee ardayda, iyo, sidoo kalena, u gogol-xaaraysa bay'o waxbarasho oo tartan leh, taas oo u suura-galineysa qof walba in uu si buuxda u soo bandhigo kartidiisa iyo hibadiisa.

### 3.3 Ujeeddooyinka Siyaasadda

- In la xaqiijiyo helitaan wabarasho xaqsooran kaasoo kor u qaadaya awoodsiinta waxbarasho loo dhanyahay.
- In la kordhiyo helitaanka, joogtaynta, dhammeystirka iyo u gudubka gabdhaha ee dhammaan heerarka waxbarashada.
- In la helo degaan waxbarasho oo ammaan ah, kaas oo ardayda Soomaaliyeed u fududaynaya horumar dhan walba ah.
- In la dhiirrigeliyo aqoon  tayaysan oo waxtar leh, taasoo suurtagelinaysa helitaanka fursado siman iyo kaqaybgalka shuruudaha asaasiga ah ee waxbarashada sare iyo, sidoo kale, xirfadaha islkufilnaashaha ee lab iyo dhedig
- In la dhiirrigeliyo helitaanka waxbarasho tayo leh, loo wada dhan yahay, kana maran takoor heer kasta.
- In la yareeyo boqollayda ardayda dugsiyada ka haraysa, ha noqdaan wiilal iyo gabdho, rag iyo dumar, dhammaan heerarka kala duwan ee waxbarashada.
- U qareemidda iskaashiga iyo abaabulka khayraadka lagu hawlgalayo.
- In la abuuro jawi habboon oo taageeraya qorshaynta, maamulka, hirgelinta, iyo dhaqangelinyta Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhaha ee dhammaan heerarka waxbarashada.

### 3.4 BAAXADDA SIYAASADDA

Dhinacyada ay siyaasaddu diiradda saarayso ayaa ah heerarka kala duwan ee waxbarashada sida ku cad Siyaasadda Waxbarashada Qaranka, kuwaasoo kala ah:

1. Waxabarashada Asaasiga ah (Waxbarashada Xanaanada Carruurta (*ECE/IQS*), Waxbarashada Hoose iyo Dhexe, Waxbarashada Asaasiga ah ee Degdegga ah, Machadyada Diiniga, iyo Waxbarashada Dugsiga Sare);
2. Waxabarashada Dadka Waaweyn iyo Tan Dadban.
3. Waxbarashada Farsamada Gacanta iyo Xirfadaha iyo;
4. Tacliinta Sare.

### 3.5 SABABAHA SIYAASADDA KEENAY

Siyaasadda Waxbarashada Gabdhaha (2025), waxa ay dejinaysaa qaabdhismeed guud oo wata qorshayaal cad si loo xoojiyo waxbarashada gabdhaha, xaqsoorka iyo u sinnaanta tacliinta, iyo sidoo kale shaqo ka helidda isla majaalka waxbarashada. Siyaasaddan waxa ay baadigoobaysaa in la ciribtiro guud ahaan qaababka kala duwan ee eexda iyo takoorka, iyadoo xaqiijinaysa in ay ragga, dumarka, wiilasha iyo gabdhuhuba si siman u wada heli karaan ugana wada faa'iidaysan karaan waxbarasho tayo leh iyo fursadaha shaqo.

Waxay si gaar ah ula tacaalaysaa duruufaha la xiriira helitaanka, joogtaynta iyo gabagabaynta waxbarashada ee gebi ahaan ardayda, sidoo kale waxay si adag diiradda u saaraysaa caqabadaha jira ee sida weyn u ragaadiyay gabdhaha. Si waafaqsan Yoolasha Horumar Waara (SDGs) 4, 5, Siyaasadda Waxbarashada (2024), Qorshaha Horumarinta Waxbarashada (ESSP 2022-2026), Siyaasaddan wuxuu hadafkeedu yahay in la tirtiro takoorka ka jira gudaha waxbarashada iyo kobcinta degaan waxbarasho oo xaqsooran kaas oo xaqiijinaya isu-dheellitirnaanta labka iyo dheddigga, ka wada qayb ahaanshaha fursado waxbarasho oo aan dhammaad lahayn.

# 4 QAABDHISMEEDKA SHARCIGA SIYAASADDA

Soomaaliya waa dal Muslim ah, waxaana udub-dhexaad u ah barashada manhajka diinta Islaamka: Qur'aanka Kariimka ah iyo Sunnada Nabiga (NNKH), kuwaas oo labaduba si cad u xoojinaya in ay raadinta cilmigu yahay waajib asaasi ah oo saaran qof walba, ha noqdo lab ama dheddig. Xadiiska Nebiga (NNKH) laga soo weriyay ayaa ah: "Doonista cilmigu waa waajib saaran qof kasta Muslim ah." (Tarmadi,74), tan oo muujinaysa muhiimadda waxbarashada oo ah xuquuq iyo mas'uuliyad ay leeyihiin dhammaan dadku.

Soomaaliya waxa ay muujisay sida ay uga go'an tahay ilaalinta xuquuqda aadanaha iyo helitaanka waxbarasho xaqsooran, taas oo ay ku caddaysay saxiixidda axdiyo iyo heshiisyo caalami ah oo kala duwan. Heshiisyadaas waxaa ka mid ah: Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka (1990); Axdiga Caalamiga ah ee Ciribtirka Dhammaan Noocyada Takoorka Jinsiga (2002); Axdiga Afrika (Banjul) ee Xuquuda Aadanaha iyo Dadweynaha (1985), iyo Axdiga Afrika ee Xuquuqda iyo Daryeelka Carruurta (1991), iyo Axdiga ee Caalimiga ah ee Xuquuqda Caruurta (2015). Soomaaliya, iyadoo saxiixday axdiyadan, waxay mar kale adkaysay ballanqaadkeeda ku aaddan difaacidda xuquuqda dhammaan muwaadiniinteeda iyada oon loo eegayn haybta, jinsiga, islamarkaana hubinaysa waxbarasho caddaalad iyo sinnaan ku dhisan oo qof walba heli karo.

DFS waxay ballanqaadkan kusii adkaysay Dastuurkeeda, si gaar ah Qodobka 30aad, kaas oo dammaanaqaadaya in waxbarashadu noqoto xaqqa asaasiga ah oo ay leeyihiin dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed, islamarkaana waajibinaya waxbarasho lacag la’aan ah oo illaa dugsiga sare ah. Xuquuqdan ayaa, sidoo kale, lagu qeexay Xeerka Waxbarashada (Qodobka 1-aad), kaasoo tibaaxaya:

*"Waxabarashadu waa xuquuq asaasi ah oo dastuuri ah oo qof kasta oo muwaadin ah xaq u leeyahay. Dawladda Federaalka Soomaaliya waxa ay mas'uul ka tahay inay waxbarashada gaarsiiso dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed.”*

Si loo taabbageliyo go’aankan, dowladdu waxa ay waxbarashada gabdhaha ka dhigtay mudnaanta ugu weyn ee Qorshaha Isbedelka Qaranka (2025–2029) iyada oo loo marayo ‘Barnaamijka kasbashada iyo Joogtaynta Dugsiyada ee Gabdhaha, kaas oo diiradda saaraya koruqaadista helitaanka, joogtaynta iyo dhamaystirka waxbarashada heerarkeeda kala duwan. WWH&TS waxa ay waxbarashada gabdhaha ku dhaftay Qorshaha Isbedelka Qaranka iyada oo hubinaysa in la qaado tallaabooyin iyo siyaasado si gaar ah uga jawaabaya sinnaan la'aanta ragga iyo dumarka, ilaalinta xuquuqda carruurta iyo kooxaha nugul.

Intaas waxaa dheer, waxbarashada loo dhan yahay waxaa loo asteeyay inay noqoto mudnaanta ugu weyn ee Qorshaha Horumarinta Waxbarashada (*ESSP* 2022–2026). Si loo dardargeliyo qorshahan, WWH&TS waxa ay 2024 aasaastay Waaxda Waxbarashada Loo Dhan Yahay, taas oo leh Unugga Waxbarashada Gabdhaha, si loo kormeero loona dedejiyo hirgelinta yoolalka la xiriira gabdhaha ee qaybta waxbarashada gabdhaha.

WWH&TS oo kaashanaysa daneeyayaasha kala duwan, waxa ay u heellan tahay inay daboosho goldaloolooyinkaas iyada oo si xaqsooran u baahineysa adeega waxbarashada, islamarkaana si nidaamsan wax uga qabaneysa caqabadaha ku gadaaman waxbarashada gabdhaha.

# Qaybta Labaad 02

5. HELITAANKA WAXBARASHO XAQSOORAN OO LOO DHAN YAHAY
6. TALLAABOOYINKA IYO HIRGELINTA HAWLAHA

# 5 HELITAANKA WAXBARASHO XAQSOORAN OO LOO DHANYAHAY

Hubinta fursado waxbarasho xaqsooran oo loo dhanyahay waa aasaaska gaarista waxbarasho caddaalad ah, taasoo horseedaysa in dhammaan dadka waxbaranaya helaan waxbarasho tayaysan iyo fursado siman. Nidaamka waxbarasho ee Soomaaliya waa mid ka kooban heerar kaladuwan, iyadoo waxbarashada asaasiga ahi tahay mid lacag la'aan ah oo carruurta waajib ku ah. Si kastaba ha ahaatee, sinnaan la'aan waxbarasho xagga jinsiga ah ayaa weli jirta, taasoo u baahan tallaabo dhab ah iyo qorshayaal gaar ah laga qaado, si loo xaqiijiyo in gabdhaha iyo dumarka ay helaan fursado waxbarasho oo caddaalad ku salaysan iyo taageero joogto ah oo u sahlaysa inay waxbarashada sii wataan ilaa ay ka dhammaystaan.

Waxbarashada loo siman yahay waxay xaqiijisaa in dhammaan shaqsiyaadku ay si siman u heli karaan agabka, fursadaha waxbarashada iyo shaqada, iyadoo aan loo eegin jinsiga ama heerka dhaqan-dhaqale ee qofka. Si kastaba ha ahaatee, muuqaalka guud ee waxbarashada Soomaaliya waxaa saameeyay colaado, barakac iyo duruufo dhaqaale kuwaasoo helitaanka waxbarashada xaqsooran ka dhigaya mid aan sahlanayn.

Tallaabooyin toosin ah ayaa lagama maarmaan ah, si looga jawaabo sinnaanta la'aanta waxbarashada, iyadoo taageero gaar ah loo fidinayo ardayda nugul. Nidaamka Kaydinta & Maamulidda Xogta Waxbarashada (*EMIS*) iyo Nidaamka Kaydinta & Maamulidda Xogta Tacliinta Sare (*HEMIS*) waxay muujinayaan horumar dhexdhexaad ah oo ku saabsan helitaanka fursado waxbarasho oo siman, taasoo ka turjumaysa hormarka ka-qaybgalka buuxa iyo fursadaha waxbarasho ee guud ahaan dalka. Hadaba, waxaa loo baahan yahay dadaallo joogto ah si loo buuxiyo farqiga waxbarashada wiilasha iyo gabdhaha; dhanka kalana la hubiyo nidaam waxbarasho oo si buuxdo looga qaybgali karo, oo dhammaan ardayda Soomaaliyeed ay heli karaan.

### 5.1Waxbarashada Asaasiga ah

Nidaamka waxbarashada asaasiga ah waxaa ka mid ah:

- Waxbarashada Xannaanada Carruurta (*ECE*) ama Dugsiyada Isku-dhafka Diiniga iyo Maaddiga(*IQS*) waa xannaanada, ilaalinta, ku ababinta xiisaha barashada iyo waxbarashada ilmaha da'doodu u dhexayso 4-6, iyadoo la marayo xarumaha xannaanada iyo barbaarinta.
- Waxbarashada Hoose/dhexe: Waa marxalad waxbarasho oo siddeed sano ah oo loogu talaggalay carruurta da'doodu u dhaxayso 6–14 sano, taasoo lagu dhiganayo fasalka 1-aad ilaa fasalka 8-aad.
- Waxbarashada Asaasiga Degdegga ah (*ABE*): waa barnaamij degdeg ah oo afar heer (sano) ka kooban, looguna talogalay ardayda da'doodu ka weyn tahay sagaal sano (9), kaas oo bixiya manhaj la soo koobay, iyada oo ardaydu u fadhiistaan imtixaanka dugsiga hoose/dhexe marka ay dhammeeyaan heerka 4aad.
- Waxbarashada Sare: Waa marxalad afar sano oo loogu talaggalay ardayda da'doodu u dhexayso 14 illaa 18 sano jir.
- Machadyada Diiniga ah: Waxa ayy aqoonta asaasiga ee Islaamka barayaan ardayda da'doodu u dhexayso 14—18 sano jir, taas oo u dhiganta waxbarashada hoose/dhexe (Fasallada 1–8), (*ABE*) (4 heer) iyo Waxbarashada Sare (Fasallada 1– 4).

**i. Bayaanka Siyaasadda**

Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha Iyo Tacliinta Sare, waxay u heellan tahay xaqiijinta in dhammaan carruurtu helaan waxbarasho asaasi ah, lacag la'aan ah, tayaysan, islamarkaana waajib ah, iyadoo si gaar ah diiradda loo saarayo kor u qaadista tirada gabdhaha ee isdiiwaangeliya, waxbarashadana joogteeya illaa ay ka dhammeeyaan.

**ii. Ujeeddooyinka Siyaasadda**

- Xaqiijinta in dhammaan carruurtu helaan waxbarashada asaasiga ah, iyada oo diiradda la saarayo waxbarashada gabdhaha.
- Kobcinta tirada gabdhaha joogteeya heerarka waxbarashada asaasiga ah illaa ay ka dhammeeyaan.
- Xoojinta barnaamijyada waxbarasho ee degdegga ah, sida (*ABE*) si fursad loogu abuuro ardayda da'doodu ka weyn tahay da'da dugsiyada aadda.
- Hubinta in nidaamka waxbarashada asaasiga ah ee rasmiga ah lagu daro machadyo diini ah oo lagu barto aqoonta Islaamka.

**iii. Bartilmaameedyada Siyaasadda**

- In matalaadda jinsiga —wiilasha iyo gabdhaha—ee waxbarashada asaasiga ahi gaarto saami siman 1:1 sannadka 2029.
- In la hubiyo, ugu yaraan in 70% gabdhaha da'doodu ka weyn tahay da'da dugsiyada ay dhammaystaan waxbarashada (*ABE*), ayna u gudbaan waxbarashada tooska ah.
- Goobo waxbarasho oo nabdoon in laga hirgeliyo miyiga, magaalooyinka iyo degaannada colaaduhu saameeyeen, si kor loogu qaado fursadaha waxbarasho ee gabdhuhu heli karaan.

**iv. Tallaabooyinka Siyaasadda**

- Hirgelinta barnaamijyada wacyigelinta bulshada si loo yareeyo caqabadaha dhaqameed ee xannibaya in gabdhuhu waxbarasho helaan.
- Xoojinta barnaamijyada quudinta dugsiyada iyo bixinta kabid dhaqaale si loo taageero qoysaska danyarta ah, islamarkaana looga hortago in gabdhuhu waxbarashada ka haraan.
- In la ballaariyo tirada barayaasha haweenka ah si loo abuuro jawi waxbarasho oo loo dhan yahay.
- In kor loo qaado amniga iyo kaabayaasha dugsiyada, oo ay ka mid yihiin goobaha fayadhawrka oo kala gaar ah iyo goobo gabdhuhu ku dareemaan xasillooni.
- In gargaar dhaqaale loo fidiyo gabdhaha nugul, sida deeqaha waxbarasho, kabka qarashaadka waxbarashada ee dugsiyada.

## 5.2 Waxbarashada Dadka Waaweyn iyo (*TVET*)

*TVET* iyo waxbarashada Dadka Waaweyn waxa ay ka kooban yihiin:

- Waxbarashada Asaasiga ah ee Dadka Waaweyn (*AdBE*): Waa barnaamij waxbarasho asaasi ah, degdeg ah, oo saddex sano soconaya, kaas oo loogu talaggalay dadka da'doodu tahay 18 sano iyo wixii ka badan.
- Akhris-qoraalka iyo Tiro-barashada: Waa barnaamij hal sano soconaya oo lagu hormarinayo xirfadaha asaasiga ah ee akhris-qoraalka iyo tiro-barashada dadka waaweyn ee da'doodu tahay 18 sano iyo ka badan.

### i. Bayaanka Siyaasadda

Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha Iyo Tacliinta Sare waxaa ka go'an in ay hormariso akhris-qoraalka ee dadka waaweyn, iyo fursadaha tababarka xirfadaha farsamada gacanta, gaar ahaan haweenka, si loo dhiirrigeliyo fursado waxbarasho oo joogto ah iyo abuurista fursado ilo dhaqaale. Waxaa si gaar ah diiradda loo saari doonaa yaraynta farqiga jinsiga ee Waxbarashada Farsamada iyo Tababarrada Xirfadaha (*TVET*).

### ii. Ujeeddada Siyaasadda

- Ballaarinta barnaamijyada akhris-qoraalka dadka waaweyn, si kor loogu qaado helidda waxbarashada asaasiga ah ee dumarka.
- Xoojinta barnaamijyada *TVET,* si loo kobciyo horumarinta xirfadaha iyo fursadaha shaqo ee dumarka
- Kordhinta ka qaybgalka dumarka ee barnaamijyada lagu baranayo ilaalinta degaanka iyo isticmaalka khayraadka dabiiciga ah ee waara.
- Hubinta in xirfadaha farsamada gacanta iyo waxbarashada dadka waaweyn ay yihiin kuwo loo dhan yahay islamarkaana wax ka qabanaya baahiyaha bulshada danyarta ama nugul.

### iii. Bartilmaameedyada Siyaasadda

- In la kordhiyo diiwaangalinta haweenka ee barnaamijyada akhris-qoraalka dadka waaweyn oo hadda ah 45.3% lana gaarsiiyo 60% sanadka 2029.
- In kor loo qaado ka qaybgalka haweenka ee barnaamijyada *TVET* 9,560 lana gaarsiiyo ugu yaraan 30,000 sanadka 2029.
- In la xaqiijiyo in ugu yaraan 30% ka mid ah barayaasha banaamijyada *TVET* ay dumar noqdaan, iyadoo la shaqaalaysiinayo lana tababarayo haween macallimiin ah si loo dhiirrigeliyo matalaadda haweenka ee tababarka xirfadeed.

### iv. Tallaabooyinka Siyaasadda

- Bixinta dhiirrigelin maaliyadeed iyo deeqo-waxbarasho si loo kordhiyo diiwaangelinta dumarka ee barnaamijyada akhris-qoraalka iyo *TVET*.
- Soo bandhigidda tababarro xirfadeed oo casri ah (tusaale: tignoolojiyadda Isgaarsiinta macluumaadka, Injineeriyadda iyo hal-abuurka) si loo ballaariyo fursadaha shaqo ee haweenka.
- Xoojinta iskaashi ee u dhaxeeya dowladda iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay si loo kordhiyo shaqa-abuurka ardayda ka qalinjebisay barnaamijyada *TVET*.
- Iskudhafidda akhris-qoraalka iyo tababarrada xirfadaha, oo lagana hirgaliyo xarumaha waxbarashada ee deeganada dadka nugul.

### 5.3Tacliinta Sare

Tacliinta Sare waxay ka koobantahay barnaamijyada lagu bixiyo kuleejyada ama jaamacadaha, laga billaabo shahaadooyinka dibloomada ee dugsiga sare kaddib, ilaa heerka ugu sarreeya waxbarashada ee *PhD*.

**i. Bayaanka Siyaasadda**

WWH&TS waxa ay dhiirrigelinaysaa in dhammaan ardaydu si siman u helaan tacliinta sare, iyada oo diiradda saareysa wax-ka-qabashada sinnaan la'aanta jinsiga ee xarumaha heerarka tacliinta sare, gaar ahaan dhinacyada diiwaangalinta, joogtaynta, iyo boqollayda qalinjebinaysa. Waxaa si gaar ah diiradda loo saari doonaa kordhinta ardayda dheddigga ah iyo shaqaalaha haweenka ah ee ka hawlgala xarumaha tacliinta sare.

ii. **Ujeeddooyinka Siyaasadda**

- In la horumariyo helitaanka, joogtaynta iyo tirada ardayda haweenka ah ee ka qalinbeddelanaysa tacliinta sare.
- In sare loo qaado matalaadda haweenka ee xilalka hoggaaminta iyo macallinimada ee jaamacadaha
- In la dhiirrigeliyo ardayda gabdhaha ah ee ka qaybgalaya barashada culuunta Sayniska, Tiknoolajiyadda, Injineeriyadda iyo xisaabaadka (*STEM*).

**iii. Bartilmaameedyada Siyaasadda**

- In diiwaangalinta dumarka ee tacliinta sare laga kordhiyo 26% lana gaarsiiyo 40% sanadka 2029.
- In la dhiirrigeliyo in ugu yaraan 30% xubnaha macallimiinta ah ee Mac-hadyada tacliinta sare ay dheddig noqdaan marka la gaaro sannadka 2029.
- In la taabbageliyo barnaamijyo tababar iyo deeqo waxbarasho si loo garab istaago haweenka dhiganaya tacliinta sare.
- Dhiirrigelinta in siyaasadda horumarinta waxbarashada gabdhaha lagu daro qaab-dhismeedka maamul ee dhammaan xarumaha tacliinta sare.

iv. **Tallaabooyinka Siyaasadda**

- Ballaarinta fursadaha deeqaha waxbarasho iyo taageerada dhaqaale ee haweenka ku jira tacliinta sare.
- Horumarinta siyaasadaha fursad-siinta gaarka ah si kor loogu qaado kaqaybgalka haweenka ee culuumta, Sayniska, Tiknoolajiyadda, Injineeriyadda iyo xisaabaadka, (*STEM*)
- Xoojinta iskaashiga jaamacadaha caalamiga ah, si loo helo barnaamijyo aqoon isweydaarsi iyo fursado cilmibaaris ah oo haweenka loogu talagalay.
- In dhammaan jaamacadaha laga hirgeliyo xarumo ardayda dheddigga ah lagu taageero si wax looga qabto caqabadaha bulsho iyo kuwo aqooneed.

# 6 TALLAABOOYINKA IYO HIRGELINTA HAWLAHA

Tallaabooyinka loogu talagalay hirgelinta Siyaasadda Horumarinta Waxabarashada Gabdhuhu waxay khusaysaa:

- **Helitaan:** Siyaasado lagu wajahayo arrimaha cabaqadaha ku ah in gabdhaha iyo wiilashu galaan dugsiyada, iyo sidii loo abuuri lahaa jawi soo dhowaynaya ardayda kuna dhiirrigelinaya inay dugsiga ku sii negaadaan.
- **Tayo:** Siyaasado lagu hagayo horumarinta tayada waxbarashada, laguna dhiirrigelinayo gabdhaha iyo wiilasha inay ka faa'iidaystaan dhammaan fursadaha waxbarasho ee uu nidaamka waxabarshadu bixiyo.
- **Joogtaynta/Dhammaystirka:** Siyaasado loogu talagalay in lagu dhiirrigeliyo ardayda ku negaanshaha iyo dhammaystirka waxbarashada heerarkeeda kaladuwan, iyo wax ka qabashada caqabadaha hor taagan kaqaybgal dhammaystiran.

## 6.1Hawlaha muhiimka ah ee hirgelinta Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhaha

Si loo xaqiijiyo hirgelinta wax-ku'oolka ah ee Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhaha, waxaa la fulin doonaa hawlaha muhiimka ah ee soo socda:

- Waafajinta, ururinta iyo falanqaynta xogta guud ee loo kalasaaray hab jinsi ah dhammaan warbixinnada, ururinta xogta, iyo cilmbi-baarista, iyadoo lagu darayo nidaamka dabagalka ee dhammaan ardayda dugsiyada, si loo kormeero horumarka loona qeexo goldaloollada jira.
- Samaynta barnaamijyo waxbarasho degdeg ah, oo loogu talagalay carruurta aan ka qaybgali karin waxbarashada tooska ah, iyadoo la dhisayo hab suuragalinaya inay si fudud uga gudbaan nidaamka waxbarashada degdegga ah, uguna gudbaan waxbarashada tooska ah.
- Kordhinta kaqaybgalka ardayda ee maamulka, iyada oo la taabbagelinayo hannaan u oggolaanaya ardayda dugsiga dhigta in ay kaalin ku yeeshaan hawlaha hoggaaminta, barnaamijyada la xiriira horumarinta xirfadaha, iyo waxqabadyada manhajka ka baxsan sida naadiyada iyo fadhiyada doodaha maxalliga ee bulshada ku saabsan.
- Ballaarinta fursadaha waxbarashada farsamada iyo xirfadaha gacanta, iyadoo la dhisayo lana kordhinayo tirada dugsiyada farsamada ee gobol kasta, si wiilasha iyo gabdhaha ay u helaan waxbarasho tayaysan.
- Horumarinta kaabayaasha dugsiyada, si loo xoojiyo waxbarasho loo dhan yahay, iyadoo la gaarsiinayo adeegyada fayadhowrka goobaha waxbarashada ee ammaanka ah ee loogu talagalay ardayda.
- Gaarsiinta gunnooyinka, kabka waxbarashada, iyo deeqaha waxbarashada deegaanada tirada joogtaynta iyo dhammaystirka waxbarashadu aad u hoseeyaan, iyada oo mudnaan la siinayo gabdhaha ku nool meelaha noloshoodu liidato sida goobaha barakacayaasha.
- Adkaynta qaab-dhismeedka sharciyeed iyo siyaasadeed, iyada oo la horumarinayo dib-u-eegisna lagu samaynayo siyaasadaha iyo habraacyada hagaya macallimiinta iyo ardayda, islamarkaana si gaar ah diiradda loo saaro in gabdhaha iyo carruurta naafada ah laga ilaaliyo tacaddiyada jinsiyeed, jireed iyo maskaxeed.

## 6.2 Tallaabooyinka lagu kordhinayo helitaanka iyo kaqaybgalka gabdhaha ee Dhamaan Heerarka Waxbarashada

Iyada oo la tixgelinayo baahida degdegga ah ee lagu horumarinayo helitaanka iyo waxqabadka gabdhaha ee heerarka kala duwan ee waxbarashada, iyada oo la fulinaayo tallaabooyinka dhaxalgalka ah ee soo socda:

- Bixinta barnaamijyo hagitaan iyo deeqo waxbarasho oo lagu taageerayo gabdhahu inay ka gudbaan waxbarashada asaasiga ah una gudbaan waxbarashada sare, gaar ahaan kulliyadaha gabdhuhu ku yaryihiin.
- Xoojinta barnaamijyada tababarka macallimiinta si loo hubiyo in hab-bariddu noqoto mid ka jawaabta baahiyaha macallimiinta, iyadoo xoogga la saarayo dhiirrigelinta ka-qaybgalka haweenka iyo kor u qaadista doorkooda hoggaamineed.
- Ballaarinta barnaamijyada taageerada dhaqaale ee loogu talagalay gabdhaha kasoo jeeda qoysaska danyarta ah, iyo dadka dhibaatooyinka u nugul, si meesha looga saaro caqabadaha dhaqaale ee waxbarashadooda hortaagan.
- Horumarinta iyo dhaqan-gelinta siyaasado ka dhan ah tacaddiyada iyo xadgudubyada jinsiga ku salaysan iyo dhibaataynta ardayda ee dugsiyada iyo jaamacadaha si loo abuuro jawi nabdoon  oo taageeraya waxbarashada ardayda.
- Kordhinta shaqaalaysiinta barayaasha dhedigga ah si ay u noqdaan hagayaal iyo tusaale wanaagsan oo gabdhaha dhiirrigeliya, gaar ahaan dugsiyada sare iyo xarumaha tacliinta sare.

# Qaybta Saddexaad 03

7. ARRIMAHA BAAHSAN

# 7 ARRIMAHA BAAHSAN

Arrimaha baahsan ma ahan kuwa hal meel taabanaya balse waa kuwa sidoo kale la xiriira mawduucyada kale ee majaalka waxbarashada gabdhaha heerarkiisa kaladuwan, iyaga oo saamaynaya dhinacyada la xiriira helitaanka waxbarasho loo dhanyahay, goobo waxbaris iyo waxbarasho ammaan ah, oo dhiirigelinaya kahortagga iyo ciribtirka xadgudubyada xagga Jinsiga (*GBV*) ee ka dhaca goobaha waxbarashada. Arrimaha kale ee la xiriira waxbarashada gabdhaha waxaa ka mid ah: helitaanka hagista, latalinta iyo adeegyada baxnaaninta dhimirka, teknolojiyadda xogta iyo isgaarsiinta, caafimaadka iyo waxbarashada, sinnaanta karaanka aadanaha, iyo bixinta waxbarasho loo dhan yahay oo daboolaysa baahiyaha gaarka ah.

**7.1 Hagitaanka, Latalinta, iyo Adeegyada Badqabka Dhimirka**

**i. Bayaanka Siyaasadda**

Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare (WWH&TS) waxaa ka go'an in la helo hagitaan, latalin, iyo adeegyo nafsad ahaan iyo bulsho ahaanba tabantaabinaya ardayda lagana hirgelinayo dhammaan hay'adaha waxbarasho ee Soomaaliya.

**ii. Ujeeddooyinka Siyaasadda:**

a. Bixinta adeegyo hagitaan iyo latalin daryeeleysa badqabka dhimirka kana jawaabaya arrimaha jinsiga, baahiyaha gaarka ah ee dadka naafada iyo tacaddiga, ee guud ahaan heerarka kaladuwan ee waxbarashada.
b. Shaqaalaysiinta iyo tababaridda barayaal iyo hawl wadeenno kale oo laga hawlgaliyo dhammaan heerarka kaladuwan ee waxbarashada si ay miyi iyo magaalaba uga bixiyaan adeegyada hagitaanka iyo daryeelka dhimirka bulshada.
c. Fulinta, dib-u-eegista iyo kormeerista habraacyadii horay u jiray ee hagitaanka, latalinta iyo adeegyada daryeelka badqabka dhimirka bulshada si loo hubiyo ka qayb galka gabdhaha ee hawlaha dugsiyada.

**iii. Bartilmaameedyada Siyaasadda:**

a. Sinnaan jinsi oo laga gaaro shaqaalaysiinta macallimiinta tababaran iyo hawlwadeennada adeegyada daryeelka dhimirka bulshada ee dhammaan heerarka waxbarashada.
b. Hiigsiga in ay ugu yaraan 30% macallimiinta iyo ardaydu ka faa'iidaystaan hagitaanka, latalinta iyo adeegyada daryeelka dhimirka bulshada ee gebi ahaan dhanka waxbarashada marka la gaaro sanadka 2029.

**iv. Tallaabooyinka Siyaasadda:**

a. Tababbaridda tiro ku filan oo macallimiin xirfadlayaal ah iyo shaqaale kale oo loo asteeyay hagida iyo ka jawaabidda arrimaha gabdhaha, latalinta, iyo adeegyada badqabka dhimirka bulshada ee heerarka kaladuwan ee dhanka waxbarashada.
b. Baahinta iyo dhaqangelinta siyaasadda horumarinta waxbarashada gabdhaha.
c. La-socoshada iyo bixinta la talin arrimaha xasaasiga ah ee ku saabsan gabdhaha, iyada oo kormeer lagu sameynayo dhammaan heerarka waxbarashada.

### 7.2 Xadgudubyada Xagga Jinsiga (*GBV*)

**v. Bayaanka Siyaasadda**

Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare waxa aysan marnaba oggoleyn una dulqaadaneyn dhammaan noocyada kala duwan ee xadgudubyada xagga jinsiga (*GBV*) ee ka dhaca dugsiyada, waxa ayna wax ka qabaynaysaa sinnaan la'aanta, takoorka, caado-dhaqameedyada xun xun ee dhanka haweenka iyo gabdhaha oo cuuryaamiya waxbarista iyo barashada dhammaan hay'adaha tacliinta, taas oo looga baaraandegay siyaasado kale oo ay kamid tahay Siyaasadda Bedqabka Dugsiyada.

**vi. Ujeeddooyinka Siyaasadda:**

a. Diyaarinta deagaan saamaxaya waxbarashada kana bedqaba xadgudub iyo amni xumo.
b. La wadaagidda xogta ku saabsan jaadadka kala duwan ee xadgudubyada tacadiyadda jinsiga *(GBV)* shaqaalaha loo igmaday ee dhammaan hay'adaha waxbarashada.
c. U aqoonsiga Xadgudubyada iyo Tacadiyadda Jinsiga *(GBV)* in ay yihiin falal lid ku ah xuquuqda aadanaha gaar ahaan gabdhaha iyo dumarka ee goobaha waxbarashada ayna ka dhalaneyso ciqaab sharciyeed.

**vii. Bartilmaameedyada Siyaasadda:**

a. Abaabulidda olole looga soo horjeedo xadgudubyada ka dhanka ah jinsiga ee wiiqaya karaanka haweenka iyo ragga ee ka faa'iidaysiga fursadaha waxbarasho.
b. Taageeridda waxbarasho lacag la'aan ah oo loo siman yahay oo ka maran Xadgudubyada Tacadiyadda Jinsiga *(GBV)* iyo noocyada kale ee nabadgalyo la'aanta.

**viii. Tallaabooyinka Siyaasadda:**

a. Ka wacyigalinta nooc kasta oo tacaddi ah iyo in loo aqoonsado faldembiyeed, iyada oo aan loo eegeyn cidda ku kacday.
b. Ku baraarujinta shaqaalaha iyo ardayda goobaha waxbarashada digniinaha muujinaya Xadgudubyada Tacadiyadda Jinsiga *(GBV)* iyo ka-hortaggooda.
c. Dhaqangelinta habraac warbixineed oo aammin ah lana heli karo falcelin degdeg ah iyo nidaamyo la-socosho oo loogu talaggalay Xadgudubyada Tacadiyadda Jinsiga *(GBV)* ee shaqaalaha iyo ardayda dugsiyada.
d. Xoojinta deegaan nabdoon oo uu ardaygu leeyahay mudnaanta koowaad marka la joogo dhammaan xarumaha waxbarashada.
e. Samaynta hagaha tababarka oo ku salaysan jinsiga korna u qaadayo karaanka shaqaalaha iyo ardayda.
f. Dhaqangelinta xeerka anshaxa ee habdhaqanka dugsiyada si looga gaashaanto xadgudubyada lagula kaco ardayda, shaqaalaha, dadka baahiyaha gaarka ah qaba iyo qaybaha kale ee dadka nugul.
g. Samaynta isku-xir istiraatiiji ah iyo yagleelidda wadashaqayn guud ahaan dhexmarta dhammaan hay'adaha dowliga ah iyo daneeyaasha waxbarashada oo ku aaddan xadgudubyada xagga jinsiga (*GBV*) ee goobaha waxbarashada.

### 7.3 Waxbarashada Reer-guuraaga iyo Waxbarashada Dhijitaalka

i. **Bayaanka Siyaasadda**

Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha iyo Tacliinta Sare waxa ay hirgalisay waxbarashada dhijitaalka ee fogaan-dersi oo ah hab tacliinta lagu gudbiyo loogana faa'iidaysto awoodsiinta iyo sinaanta gabdhaha, waxa ayna sidoo kale hirgalin doontaa waxbarashada reer-guuraaga.

ii. **Ujeeddooyinka Siyaasadda:**

a. Bixinta adeegyo waxbarasho tayaysan iyo fursado loo siman yahay helitaankooda, iyada oo la adeegsanaayo waxbarashada reer-guuraaga iyo fogaan-dersiga.
b. Dhiirrigalinta waxbarasho isku-dhafan iyada oo la adeegsanayo nidaam u diyaarsan (Fogaan-darsi) dugsiyada ee dhammaan heerarka kala duwan, taas oo ay dhaqangelintiisa durba ku hawlan yihiin dugsiyada hoose/dhexe, sare iyo qaar ka mid ah xarumaha waxbarashada tacliinta sare.
c. Bixinta waxbarasho dhijitaal ah iyo fursado barasho oo la jaanqaadaya dhammaan ardayda.

iii. **Bartilmaameedyada Siyaasadda:**

a. Kordhinta u sinnaanta wiilasha iyo gabdhaha ee helitaanka waxbarashada reer-guuraaga iyo tacliinta dhijitaalka ah.
b. Sare-u-qaadidda wacyiga ku aaddan halbeegyada iyo caadooyinka bulsheed ee togan ee la xiriira waxbarashada gabdhaha.
c. Kordhinta tirada barnaamijyada la xiriira waxbarashada reer-guuraaga iyo tacliinta dhigitaalka ah si la mida ardayda wax ku barata qaabka qadiimiga ah ee foolka-foolka ee dhammaan goobaha waxbarashada.

iv. **Tallaabooyinka Siyaasadda:**

a. Wadashaqaynta bahda waxbarashada, si ay u fududeeyaan baahinta tacliinta dhijitaalka ah.
b. Tusmaynta iyo faafinta caadooyinka iyo dhaqannada wanaagsan ee ku aaddan waxbarashada reer-guuraaga iyo tacliinta dhigitaalka ah.
c. Xoojinta waxbarashada isku dhafan ee waxbarashada heerarkeeda kala duwan.

# Qaybta Afaraad 04

8. ABAABULKA KHAYRAADKA, QOONDAYNTA, IYO JOOGTAYNTA
9. DUKUMINTI MAGUURAAN AH

# 8 ABAABULKA KHAYRAADKA, QOONDAYNTA IYO JOOGTAYNTA

**i. Bayaanka Siyaasadda**

Heerka dejinta iyo dhaqangelinta Siyaadda, waxa uu mudnaan gaar ah siinayaa qoondaynta, abaabulka iyo hubinta in khayraad waara sida maalgelinta iyo karaanka aadanaha kuwaas oo aad u xaddidan. Sidaas darteed, waxaa biyo- kamadhibcaan ah in si hufan loo qeexo ilaha maalgelinta, gaar ahaan, iyo in la jideeyo hannaan lagu abaabulo khayraadka si loo sugo hirgelinta waarta ee Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhaha.

**ii. Ujeeddooyinka Siyaasadda:**

a. In lajoogteeyo khayraadka iyo maalingelinta si loo sugo hirgelinta siyaasadda.
b. In xaqsoor lagu saleeyo qoondaynta, iyo qaybinta khayraadka inta fulinta siyaasaddu socoto iyada oo la adkeynaya qiimeynta iyo isla xisaabtan ka.
c. In la hormariyo lahaanshaha iyo ka qeybgalka bulshada arimaha horumarinta waxbarashada gabdhaha.

**iii. Bartilmaameedyada Siyaasadda:**

a. In loo qoondeeyo miisaaniyad u gaar ah horumarinta waxbarashada gabdhaha.
b. Isku duwidda bahwadaagta waxbarashada si loo maalgeliyo barnaamijyada horumarinta waxbarashada gabdhaha.

**iv. Tallaabooyinka Siyaasadda:**

a. In la dhiso awoodda waaxaha Wasaaraddaha Waxbarashada ee heer Federaal iyo heer Maamul Goboleed si ay fuliyaan qaabdhismeedyada Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhaha.
b. In sare loo qaado awoodda hay'daha dowladda ee ku aaddan dejinta iyo fulinta miisaaniyada si loo joogteeyo abaabulka khayraadka loogu talagalay horumarinta waxbarashada gabdhaha.
c. In la diyaariyo kulamo wadatashi oo ay isugu imaanayaan dhamaan daneeyayaashaoo lagu qiimeynayo waxqabadka iyo waaritaanka barnaamijyada horumarinta waxbarashada gabdhaha.

# 9 Dukuminti Maguuraan Ah

Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhaha (2025) waa in la baahiyaa lagana dhigaa mid ay heli karaan dhammaan daneeyayaasha iyo bahwadaagta waxbarashada si loo hirgeliyo fulinteeda. Sidoo kale, waa in dib-u-eegis lagu sameeyaa shantii sanaba mar iyada oo la tixgelinayo natiijada ka soo baxda hawlaha kormeerka iyo qiimaynta nidaamka waxbarashada.

# Qaybta Shanaad 05

10. QAABDHISMEEDKA HIRGELINTA SIYAASADDA

# 10 QAABDHISMEEDKA HIRGELINTA SIYAASADDA

**i. Hordhac**

Ka go’naanshaha hormarinta waxbarashada gabdhaha heerarkeeda kala duwan waxa ay muujinaysaa waajibaadka dalka ka saaran helidda xal waara si loo gaaro sinnaan dhammaystiran. Dhaqangelinta SHWG, iyo qaab dhismeedka fulinta shanta sano ee soo socota waxa ay ku salaysan yihiin natiijada dib-u-eegista siyaasaddii hore u jirtey.

**ii. Ujeeddada Qaabdhismeedka**

Qaabdhismeedku waa in uu hago hirgelinta Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhaha.

## 10.1 Qaabdhismeedka Hirgelnta

Qaamdhismeedka hirgelinta waxa uu salka ku hayaa afar tiir oo muhiim ah kuwaas oo kala ah: Deegaan taageero leh, geeddisocod, qaabdhismeedyo iyo habraacyo. In la sameeyo nidaamyo ku habboon hay'adaha iyo qaabdhismeed loogu talaggalay falanqaynta waxabarashada gabdhaha, iyo iskudhafka waxbarashada gabdhaha, siyaasadaha iyo qorshayaasha kale ee waxbarashada. Arrintani waxa ay dhidibada u taagaysaa madal lagu gaarayo xaqsoor iyada oo loo marayo go’aan siyaasadeed, abuuris iskaashi lala yeesho daneeyayaasha. Dhanka kale kobcinta awoodda iyo wadaagga tijaabooyinka taabbagalay ayaa udubdhexaad u ah hirgelinta siyaasadda.

| Waxyaabaha Muhiimka ah ee Qaabdhismeedka Siyaasadda Waxbarashada Gabdhaha | |
|---|---|
| **Deegaan Taageero Leh** | • Go’aan siyaasadeed<br>• Qaabdhismeedka sharci dejinta iyo maamulka<br>• Khayraad ku filan (Dad iyo Dhaqaale)<br>• Ka-qaybgalka firfircoon ee bulshada degaanka |
| **Geeddi-socod** | • Dhisidda qaabdhismeed iyo habraacyo cad oo shaqaynaya<br>• Horumarinta iyo Hirgelinta Siyaasadda Waxbarashada gabdhaha<br>• Isku dhafka arrimaha jinsiga iyo qorshayaasha waxbarashada dalka. |
| **Qaabdhismeedyada** | • Wasaaradda Waxbarashada iyo Wasaaradaha kale ay khuseyso ee Heer federaal iyo Heer Dowlad-Goboleed.<br>• Waaxyaha Waxbarashada loo dhanyahay ee Wasaaradaha Waxbarashada Heer Federaal, Heer Maamul Goboleed iyo Maamulka Gobolka Banaadir<br>• Qeybaha horumarinta waxbarashada gabdhaha ee, Wasaaradaha Waxbarashada Heer Federaal, Heer Maamul Goboleed iyo Maamulka Gobolka Banaadir |

| | |
|---|---|
| **Agab iyo Habraacyo** | • Falanqaynta xogta waxbarashada gabdhaha iyo xirfadaha iskudarka<br>• Horumarinta aqoonta iyo dhisidda wacyiga jinsiga ee macallimiinta iyo hawlwadeennada waxbarashada<br>• Hannaanka qiimaynta waxqabadka siyaasadda.<br>• Bixinta agabka muhiimka u ah helitaanka adeeg waxbarasho oo tayo leh. |

*Xigasho: Waxaa laga Soo Qaatay Buug-gacmeedka Nidaamka Maaraynta ee Waddama Barwaaasooranka, 1999 (Adapted from the Commonwealth Gender Management System Handbook, 1999)*

## 10.2 Doorka iyo Mas'uuliyadaha Wasaaradaha Waxabarashada

Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha Iyo Tacliinta Sare ee heer Federal iyada oo raacaysa tilmaamahan iyo qaabdhismeedkan awoodsiinta ah waxaa laga filayaa:

- Dib-u-eegista, daabacaadda iyo baahinta SHWG si loo dhaqangeliyo.
- In la sameeyo wacyigelin xooggan oo ku saabsan muhiimadda siyaasadda, lana gaarsiiyo dhammaan qaybaha kala duwan ee waxbarashada.
- Dejinta misaaniyad lagu hormarinayo Waxbarashada Gabdhaha.
- Wacyigelinta iyo tababbarka saraakiisha ku hawlan hirgelinta siyaasaddan
- Ka howgelinta Guddiga Bahda Waxbarashada (*CEC*) iyo farsamada ee waxbarashada loo dhanyahay si loo hirgeliyo siyaasaddan
- Iskadubaridka hirgelinta siyaasadda.
- La socoshada iyo qiimaynta arrimaha waxbarashada gabdhaha ee dhammaan heerarka kala duwan ee waxbarashada
- Dabagalka iyo kormeerka qaran ee Siyaasada Hormarinta Waxbarshada Gabdhaha.
- Sameynta cilmi-baaris ku salaysan caqabadaha hortaagan u sinnaanta waxbarashada .

**Wasaaradaha Waxbarashada ee Heer Dowlad-goboleed iyo Maamulka Gobolka Banaadir:**

Wasaaradaha Waxabarashada ee Heer Dowlad-goboleed iyo Maamulka Gobolka Banaadir waxaa laga filayaa:

- Kahowgelinta Guddiga Bahda Waxbarashada (*CEC*) iyo shaqaalaha farsamada ee waxbarashada loo dhanyahay si loo hirgeliyo siyaasaddan
- Iskadubaridka hirgelinta siyaasadda.
- Diyaarinta Qorshe hawleed lagu hirgelinayo siyaasaddan
- Hirgelinta Qorsha hawleedka Sanadlaha.
- Samenyta wacyi galin ku saabsan waxbarashada Gabdhaha
- Bixinta tabo baro lagu hormarinaayo waxbarshada gabdhaha.

# QABDHISMEEDKA HIRGELINTA SIYAASADDA (2025-2029)

| Siyaasadaha | Tallaabooyinka (oo loo kala saaray heerarka waxbarashada) | Hawlaha(oo loo kala habeeyay sida ay kula mudan yihiin) |
|---|---|---|
| **Helitaanka** | | |
| 1. Xoojinta halbeegyada u sinnaanta ka qaybgalka waxbarashada, iyadoo diiradda la saarayo diiwaangalinta, haynta iyo soo xaadiritaanka gabdhaha iyo carruurta nugul. | **<u>Asaasi</u>**<br>• Waxaa waalidiinta, macallimiinta iyo adeegsadayaasha xarumaha waxbarashada (ardayda, dugsilayda iyo jaamiciyiinta) lagu dhiirrigalinayaa ka qaybgalka maamulka si loo gaaro daah-furnaan, isla-xisaabtan, hilaadin iyo ka-qaybgal hufan oo ku dhisan maamul-wanaag, oo ay ku jiraan dadaallada lagu yaraynayo sinnaanta la'aanta jinsiga.<br>• Waalidiinta waxaa laga doonayaa in ay ubadka (gabdho iyo wiilalba) geeyaan dugsiga hoose kuna taageeraan.<br>**<u>Dhammaan Heerarka</u>**<br>• Dibu-eegista shuruucda, xeerarka iyo qawaaniinta waxbarashada, oo ay ku jiraan Halbeegyada Tayada ugu Yar, iyo haddii loo baahdo wax ka beddeliddooda si loo xaqiijiyo jawi sinnaan jinsi ku dhisan oo ay ka faa'iidaystaan ardayda, macallimiinta iyo maamulayaasha.<br>• Horumarinta iyo dhiirrigelinta iskaashiga dhammaan daneeyayaasha (bulshooyinka degaanka) si kor loogu qaado ka-qaybgalka loo siman yahay. | • Xoojinta qorsha-dejinta waaxyaha heer federaal ]iyo heer dowlad-goboleedyada, iyo sare u qaadidda awooddiisa ku aaddan xog-ururinta, falanqaynta iyo kormeerka arrimaha la xiriira jinsiga.<br>• Waa in uu maamulka iyo maaraynta dugsiga ee ka war-qabka arrimaha jinsigu ku jiraa manhajyada tababarka macallimiinta.<br>• U tababaridda maamulka iyo macallimiinta dugsiga falanqaynta jinsiga iyo qorshaynta isla markaana lagula xisaabtamo dhaqangelinta xirfadahan.<br>• Qabashada ololе bulshada ku baraarujinaya muhiimadda iyo faa'iidooyinka waxbarashada iyo kaalinta ay ka ciyaari karaan taageeridda waxbarashada ubadkooda. |

| | | |
|---|---|---|
| | • Qorshaynta iyo maaraynta nidaamka waxbarashada waxaa sees looga dhigi doonaa xog caddaymo cuskan oo kala saafaysa jinsiga.<br>• Waa in uu jiraa kormeer hufan iyo qiimaynta nidaamka.<br>• WWH&TS waa in ay si firfircoon u kormeerto horumarka hawlaha tijaabada ah ee dhiirrigeliya ka-qaybgalka waxbarasho, isla markaana qiimeyso si loo ballaariyo ama kor loogu qaado. | • Waa in la ogaado oo tallaabo laga qaado qoysaska ku fashilmay in ay carruurtooda u diraan dugsiga hoose. |
| 2. Hirgelinta tallaabooyin waajib ah si loo hubiyo in ay dhammaan hay'adaha waxbarasho caadi ka dhigaan kala soocidda jinsiga iyo falanqeynteeda guud ahaan warbixinnada, ururinta xogta, iyo hawlaha cilmi-baarista. | **<u>Asaasi</u>**<br>• Waa in la horumariyaa nidaamka raadraaca sooyaalka dhallaanka.<br>**<u>Dhammaan Heerarka</u>**<br>• Dhammaan dhinacyada Nidaamka Kaydinta & Maamulidda Xogta Waxbarashada Soomaaliya (EMIS) waxaa loo kala soocayaa jinsi ahaan iyadoo la adeegsanayo tilmaamayaal ku habboon.<br>• Xog-ururin joogto ah oo la sameeyo si loo hubiyo kor-joogtaynta ka-qaybgalka hannaanka waxbarasho ee dhammaan jinsiga, gaar ahaan gabdhaha. | ● Dejinta iyo ku-daridda EMIS tilmaamayaal muujinaya muhiimadda waxbarashada gabdhaha.<br>● Hirgelinta raadraaca dhallaanka ama nidaamka dabagalka carruurta da'da waxbarashada gaartay ee dugsiyada dhigta iyo kuwa aan weli la diiwaangelin. |
| 3. In la qaado tallaabooyin cadcad oo lagu horumarinayo waxbarashada gabdhaha, haweenka iyo kooxaha nugul ee heerarka dugsiga sare iyo tacliinta sare | **<u>DS</u>**<br>● Bixinta koorsooyin dib-u-habayn ah oo la siinayo gabdhaha raba inay kaddib dugsiga sare galaan waxbarashada qaybaha labku ku badan yahay<br>**DS iyo TS**<br>● Dejinta bartilmaameedyo shan sano ah si loo kordhiyo gabdhaha iyo wiilasha ku biiraya machadyada iyo koorsooyinka aysan aadka uga dhex muuqan. | ● Diyaarinta agabka waxbaridda ee lamahuraanka u ah barnaamijyada diyaarinta ardayda ee maaddooyinka xisaabta iyo sayniska. |

| | | |
|---|---|---|
| | ● In koorsooyin dib-u-habayn ah la siiyo gabdhaha loo arko inay ku guuldarraysan rabaan ama ka hari rabaan dugsiga sare ama tacliinta sare.<br>● Dib-u-eegista hababka waxbarista ee DS iyo TS si luu hubiyo in ka-qaybgalka gabdhaha aanu xannibnayn.<br><br>**<u>TS</u>**<br><br>● In tababar la siiyo cilmibaarayaasha iyo farsamayqaannada, iyadoo la adeegsanayo Tallaabooyinka tallaabo dhaxalgal ah si matalaadda haweenku muddo toddobo sano ah u gaarto 25%.<br><br>● Aqoonsashada iyo u tababaridda haweenka kartida iyo ifafaalaha leh jagooyinka hoose ama maamulka dhexe, iyo dardar-gelinta kobcintooda si ay uga mid noqdaan maamulka waxbarashada.<br>● Ku kabidda dhibco dheeraad ah ama hoos-u-dhigidda dhibcaha ay gabdhuhu ugu gudbi karaan tacliinta sare si loogu sinnaado fursadaha waxbarashada. | ● Dib-u-eegista qeexitaanka shaqooyinka iyo shuruudaha dallacsiinta si loo xaqiijiyo inay ka tarjumayaan baahida loo qabo wax ka qabashada sinnaan la'aanta u dhaxaysa labada jinsiga, heerka dakhliga, gobolka iyo kooxda bulsheed oo ah qayb lamahuraan u ah waxqabadka shaqada.<br><br>● Dejinta qoondooyin gaar ah oo loogu talagalay gelitaanka gabdhaha iyo haweenka ee tacliinta sare.<br>● Bixinta deeqo waxbarasho gaar ah iyo barnaamijyo kafaalo-qaad ah. |
| 4. Qorshaynta dib-u-diiwaangelinta ama dugsi-ku-soo-celinta gabdhaha iyo wiilasha waxbarashada ka haray, oo ay ku jiraan gabdhaha uga tegay sababo la xiriira uur ay qaadeen, wiilasha iyo gabdhaha nolosha qoysaska dabbara, iyo carruurta shaqeeya, IWM.<br>. | **<u>Asaasi</u>**<br>● In la helo habab kale oo waxbarasho dadban ah lana jaanqaadaya, oo ay heli karaan dhammaan kuwa awoodi waayay inay xaadiraan waxbarashada tooska ah, carruurtuna waa in ay awoodi karaan in ay isaga gudbaan labada nidaam.<br>**<u>Dhammaan Heerarka</u>**<br><br>● Waa in waajib laga dhigo in ay gabdhaha iyo wiilasha waxbarashada ka haray dib ugu soo laabtaan dugsiga, si gaar ah gabdhaha uga tagay uur dartiis.<br>● Sidoo kale, diyaarinta warbixino joogto ah oo sharraxaya sababaha soo noq-noqoshada gabdhaha iyo wiilasha ama ay uga baxayaan waxbarashada. | ● Dejinta tilmaamo, habraacyo iyo xeerar loogu talaggalay dib u soo laabashada ardayda waxbarashada ka tagay.<br>● Dejinta habraacyo loogu talaggalay aqbalaadda carruurta ka soo beddelatay waxbarashada dadban ama u beddelanayaa dhanka kale. |

| TAYADA/GUUSHA | | |
|---|---|---|
| 5. Hubinta in manhajyadu yihiin kuwo tixgelin xasaasi ah siinaya sinnaanta labka iyo dheddigga, diiraddana saaraya xirfadaha nololeed, sida hoggaaminta iwm, si kor loogu qaado kalsoonida nafeed iyo qanaacada gabdhaha. | <u>**Asaasi**</u><br>● In la dhaqangeliyo habraacyo ay carruurtu, gaar ahaan gabdhuhu uga qayb qaadan karaan maamulka, kobcinta xirfadaha nolosha sida ka mid noqoshada naadiyada ciyaaraha, iwm<br>● Dhaqangalinta qaabab waxbaris oo tixgelin xasaasi ah siinaya kaladuwanaanta jinsiga, ardayduna udubdhexaad u tahay fasalka.<br>**Asaasiga iyo Sare**<br>● Xoojinta awoodda Guddiga Imtixaanaadka Qaranka ee falanqaynta natiijooyinka iyadoo laga eegayo jinsiga iyo dhinacyo kale, iyo ka talo-bixinta sida kor loogu qaadi karo waxqabadka wiilasha iyo gabdhaha.<br>● Adkaynta awooda Kormeeraha Guud si u taageero una kormeero macallimiinta iyo maamulayaasha dugsiyada, si loo abuuro jawi waxbarasho oo tixgelinaya jinsiga.<br>● In ardayda la siiyo buugaag waxbarasho oo arrimaha jinsiga ku habboon kuwaasoo gabdhaha iyo wiilasha ku dhiirrigelinaya inay dhammaan maaddooyinka si fiican u bartaan<br>**Dhammaan Heerarka**<br>● In manhajka waxbarashada lagu daro waxbarasho la xiriirta jinsiga(Sex education) iyo nolosha qoyska.<br>● Halbeegayaal waxqabad ayaa la dejin doonaa, waxaana lagu qiimayn doonaa machad kasta iyadoo laga duulayo halbeegyadan, kuwaasoo ay tahay inay ku jiraan tallaabooyin loogu talagalay sinnaanta jinsiga. | ● Samaynta barnaamij tababarro joogto ah oo la siinayo shaqaalaha muhiimka ah ee waaxda qorsheynta, Guddiga Imtixaanaadka, Kormeerka Waxbarashada, Xarunta Qaranka ee Horumarinta Manhajka, iyo hay'adaha kale, si ay u bartaan falanqaynta arrimaha labada jinsi.<br>● Dib-u-eegis lagu sameeyo manjaka TS, laguna daro cutubyo ku saabsan falanqaynta arrimaha jinsiga ee cilmiga dhaqaalaha, waxbarashada, tirakoobka iyo culuumta bulshada.<br>● Dhisidda guddi madaxbannaan iyo habraac gaar ah oo lagu hubinayo in agabka waxabarashadu daabaqaad iyo takoor jinsi ka maran yahay. |

| | | |
|---|---|---|
| 6. In la dhiirrigeliyo oo la kala duwo tababbarka farsamada iyo xirfadaha, lana tirtiro dhammaan daabqaadaha jinsiga ee la xiriira xulashada koorsooyinka WFTX. | **<u>DS</u>**<br>In gobol kasta laga dhiso dugsi farsamo, iyadoo si tartiib tartiib ah kor loogu qaadayo tiradooda markay suurtaggal noqoto, kuwaasoo bixinaya barnaamijyo kala duwan si wiilasha iyo gabdhuhu u helaan fursado ay ka qaybqaataan.<br><br>**<u>Dhammaan Heerarka</u>**<br><br>● Samaynta cilmibaaris lagu ogaanayo sababaha keena in wiilasha iyo gabdhuhu ka baxaan sayniska iyo tignoolojiyadda, si gaar ah gabdhaha.<br>● In la isku xiro waxbarashada farsamada iyo xirfadaha iyo baahiyaha suuqa shaqada gudaha, heer goboleed iyo heer caalami | ● In lagu dhiirrigeliyo gabdhaha inay ku biiraan shaqooyinka wiilashu ku badan yihiin, iyo wiilasha doonaya inay shaqooyinka dumarku ku badan yihiin<br>● Xaqiijinta in barnaamijyadda xirfadeed ay la jaanqaadayaan baahida gabdhaha iyo wiilasha.<br>● In la hubiyo in adeegyada hagitaanka iyo latilntu wax ka qabanayaan arrimaha jinsiga. |
| 7. Higelinta tallaabooyin lagu wanaajinayo, si gaar ah kaqaybgalka gabdhaha ee sayniska iyo tignoolojiyadda iyo fursada kale ee waxbarashada. | **DS iyo WS**<br>● Tallaabooyin gaar ah oo lagu taageerayo gabdhaha iyo kooxaha nugul inay ka qaybgalaan sayniska iyo dhinacyada tignoolojiyadda la xiriira, oo ay ku jiraan tartamada bandhigyada sayniska iyo dhiirgelinta/abaalmarinnada.<br><br>**<u>Dhammaan Heerarka</u>**<br><br>● In goobo latalin cilmi-nafsi laga sameeyo dugsiyada iyo kuleejyada<br>● Dejinta iyo faafinta tilmaamo lagu yaraynayo dib-u-celinta gabdhaha iyo wiilasha. | ● In waxbarasho bilaash ah la siiyo 20 gabdhood sanadkiiba, kuwaasoo u qalma tababarka sayniska iyo/ama tignoolojiyadda.<br>● Aqoonsiga iyo kartigelinta haweenka ka dhex muuqda baridda sayniska iyo tignoolojiyadda si ay gabdhaha waxbaranaya tusaale ugu noqdaan. |
| | | |

| HAYNTA/DHAMMAYSTIRKA | | |
|---|---|---|
| 8. In la hubiyo in dhismayaasha iyo dayactirka xuramaha waxbarashada ay la jaanqaadaan baahiyaha jinsiga. | **Asaasi**<br>● Samaynta garoomo lagu ciyaaro oo ay gabdhaha iyo wiilashu si xor uga qayb qaadan garaan ciyaaraha kala duwan iyo kubadda cagta.<br>**Dhammaan Heerarka**<br>● Goobaha fayadhowrka oo wiilal iyo gabdho u kala qabysan, oo ay ku jiraan suuliyada gabdhaha. | ● Dejinta hagayaal o tixgelinaya islamarkaana ka jawaabaya baahiyaha jinsiga<br>● In kaabayaasha dugsiyadu raacaan hagayaal tixgelinaya islamarkaana ka jawaabaya baahiyaha jinsiga, si gaar ah goobaha nadaafadda.<br>● In dhammaan dugsiyada iyo suuliyada gabdhaha laga helo agab nadaafadeedka degdegga ah oo ay ku jiraan xafaayadaha.<br>● Samaynta goobo ku habboon in lagu tuuro agabka nadaafadda kaddib marka la isticmaalo. |
| 9. In deeqo gaar ah la siiyo, khayraadkana si mudnaan leh loogu qaybiyo dadka danyarta ah ee caqabado jinsiga la xiriira ka horjoogaan ka qaybgalka iyo helitaanka waxbarshada. | **Asaas**<br>● Miisaaniyad gaar ah waa in loo qoondeeyo goobaha/dugsiyada ay haynta/dhammaystirka waxbarashadu aad u hooseeyo.<br>● Maamulayaasha dugsiyadu waa inay hubiyaan in qorshayaasha kharash-bixinta ee kababka dugsiyadu ay yihiin kuwo labada jinsi u siman yihiin.<br>**DS iyo WS**<br>● Machadyada DS iyo WS waa inay hubiyaan in gabdhaha iyo wiilashu si siman uga faa'iidaysanayaan mashaariicda dhaqaale-abuurka ee loo hirgeliyay taageeridda miisaaniyaddooda, iyadoo la eegayo xadka awoodda machad kasta. | ● Dejinta iyo faafinta tilmaamo la xiriira sida deeqaha waxbarasho iyo kaalmada dhaqaale ardayda mudan loo siin doono<br>● Miisaaniyadda deeqaha waxbarasho iyo kaalmooyinka dhaqaale waa in loo qoondeeyo gabdhaha iyo kooxaha danyarta ah. |

| | | |
|---|---|---|
| | ● Dugsiyadu waa inay diyaariyaan oo soo gudbiyaan qorshaha sanadlaha ah ee muujinaya hawlaha dhaqaale-abuurka, iyagoo si siman u qaybinaya dadaalka looga baahan yahay wiilasha, gabdhaha, ragga iyo dumarka.<br>**<u>WS</u>**<br>● Maamulayaasha waxbarashada sare waxaa laga doonayaa in ay muujiyaan baaxadda xaqsoorka kharash bixintooda iyo sida labada jinsi ugu siman yihiin. | |
| 10. Hubinta in gabdhaha, wiilasha iyo dumarka laga ilaaliyo xadgudubka jinsiga ah iyo baaqyada jinsiga ee aan la rabin ee ka dhaca goobahaha waxbarashada. | **<u>Asaasi iyo Dugsi Sare</u>**<br>● Adeegsiga Miiska Jinsiga iyo Carruurta ee Booliiska Qaranka, Xafiiska Difaaca Xuquuqda, iyo nidaamyada sirta ah si ay carruurta waxyeellada gaystay ugu suurtagasho inay dambiilayaasha ka warbixiyaan iyagoon aan wax dhibaato ah la kulmin.<br>**<u>Dhammaan Heerarka</u>**<br>● Dejinta iyo faafinta xeerarka anshax marinta ardayga iyo macallinka, oo ay ku jiraan habraacayo cadcad oo qeexaya ciqaabta dambiilayaasha ah. | ● Samaynta guddi wadatashi oo ka kooban maamul, macallimiin iyo arday. |
| | | |
| | | |

# Qaybta Lixaad 06

11. KORMEERKA IYO QIIMAYNTA

# 11 KORMEERKA & QIIMAYNTA

**i. Hordhac**

Kormeerka iyo qiimayntu waa waxyaabaha lagu hubinayo in arrimaha jinsiga si dhab ah loogu daray waxbarashada si gaar ah nidaamka dugsiyada. Waa lama huraan in la sameeyo nidaam isku-dhafan oo lagu kormeero laguna qiimeeyo hirgelinta, iyadoo la adeegsanayo jawaabcelin waxtar leh oo hufan. Si loo hubiyo horumar la taaban karo oo ku aaddan sinnaanta jinsiga iyo ka-qaybgalka bulshada ee waxbarashada; waxaa lagama maarmaan ah in si joogto ah loo qiimeeyo dhammaan heerarka nidaamka waxbarasho. Sidaas darteed, la socoshada iyo qiimayntu waxay noqon doonaan laba arrimood oo muhiim u ah hirgelinta Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhaha. Qorshaha kormeerka iyo qiimeynta waa dukuminti faahfaahsan oo loogu talagalay in si waxku'ool ah loola socdo dhammaan tallaabooyinka la xiriira fulinta Siyaasaddan.

**ii. Ujeeddooyinka**

Si gaar ah, qayabaha kormeerka iyo qiimaynta ee siyaasaddan waxay ujeeddadoodu tahay:

- Bixinta jawaabcelin sax ah oo waqtiyaysan oo ku saabsan waxtarka dadaallada sinnaanta jinsiga lagu dhex darayo waxbarashada heerarkeeda kala duwan;
- In arrimaha jinsiga lagu daro hababka kormeerka iyo qiimaynta si ay u hagaan go'aamada siyaasadda la xiriira ;
- Soojeedinta habraacyo kormeerka iyo qiimeynta si loogu hago hirgelinta iyo qiimaynta waxtarka leh ee Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhaha;
- Diyaarinta qaabdhismeed maangal ah oo hagaya dukumintiyada waxqabadka, qorshayaasha iyo siyaasadaha, iyo saamaynta ay nidaamka waxbarashada ku leeyihiin;
- In la dhimo caqabadaha habsami-u-socodka lana wanaajiyo hawalaha falagelinta ee Siyaasadda Horumarinta Waxbarashada Gabdhaha; iyo

# KORMEERKA IYO QIIMAYNTA SIYAASADDA (2025-2029)

| **Doorashada Siyaasadda** | **Halbeeg** | **Hay'adda Masuulka ka ah/Muddada Fulinta** | |
|---|---|---|---|
| | | **Qaybaha Xogta ururinaya** | **Warbixinta** |
| **Helitaan** | | | |
| 1. Kor u qaadidda tallaabooyinka loogu talagalay ka-qaybgal xaqsooran oo dhanka waxbarashada ah, gaar ahaan diiwaangelinta, sii haynta iyo ka-qaybgalka gabdhaha iyo carruurta danyarta ah | Xogta diiwaangelinta iyo ka-haridda waxbarashada oo loo kala saaray hab jinsi ah, laga bilaabo fasallada sare ee dugsiga hoose ilaa heerka jaamacadeed. | EMIS, HEMIS iyo TMIS | WWH&TS |
| 2.Dhaqangelinta tallaabooyin waajibinaya in xogaha loo kala saaro hab jinsi ah, sidoo kalena falanqaynta, xog-ururinta iyo cilmi-baarisyada habkaas lagu saleeyo. | Helitaanka dhammaan xogaha oo loo kala soocay qaab jinsiga—lab iyo dheddig— waafaqsan. | EMIS, HEMIS iyo TMIS | WWH&TS |
| 3. In la qaado tallaabooyin dhaxalgal ah oo lagu wanaajinayo waxbarashada gabdhaha, haweenka iyo kooxaha nugul ee heerarka kala duwan. | Jiritaanka siyaasado dhaxalgal ah oo ka jira waxbrashada heerar keeda kala duwan. | Waxbarashada Asaasiga ah | WWH&TS |
| 4. Qorshaynta dib-u-diiwaangelinta ama dugsi kusoo celinta gabdhaha iyo wiilasha waxbarashada ka haray, oo ay ku jiraan gabdhaha uga tegay sababo la xiriira guurka, wiilasha iyo gabdhaha nolosha qoysaska dabbara, iyo caruurta shaqeeya, IWM. | Jiritaanka maamul haga dariiqooyinka diiwaangelineed ku habboon ardaydaas | WWH&TS | WWH&TS |
| **Tayada** | | | |
| 5. Hubinta in manaahijtu yihiin kuwo tixgelin xasaasi ah siinaya sinnaanta labka iyo dheddigga, diiraddana saaraya xirfadaha nololeed, sida hoggaaminta, IWM si kor loogu qaado kalsoonida nafeed gabdhaha. | • Waxqabadka Imtixaanaadka Qaranka<br>• Ka baab'inta daabaqaadaha jinsiga hababka waxbarista/agabka waxbarashada. | Waaxda Imtixaanaadka<br><br>Waaxda Manhajka, Tayo dhowrka. | WWH&TS<br><br>WWH&TS |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 6. Dhiirrigelinta farsamada iyo tababarka xirfadaha iyo baabi'inta kala duwanaashaha jinsiga ee xulashada maadooyinka farsamada. | Bedelidda sooyaalka jinsiga ee suuqa shaqada | Agaasinka TVET | WWH&TS (2-dii sano ee Kasta)) |
| 7. Dhaqangelinta tallaabooyin gaar ah oo lagu hormarinayo kaqaybgalka gabdhaha ee Sayniska iyo tignoolojiyadda, iyo fursadaha kale ee tacliinta sare. | Heerka isbeddelka ee dhanka dheellitrnaanta diiwaangalin iyo ka qalinjebinta kulyadaha sayniska iyo tignoolajiyadda. | Agaasinka Tacliinta Sare | WWH&TS |
| **Haynta/Dhammaystirka** | | | |
| 8. In la hubiyo in dhismayaasha iyo dayactirka xuramaha waxbarashada ay la jaanqaadaan baahiyaha jinsiga. | Tirada xarumaha leh tashiilaadka fayadhowrka oo wiilal iyo gabdho u kala qaysan. | WLDY/ Waaxda Kaabayaasha | WWH&TS |
| 9. Gaarsiinta kaalmada maaliyadeed kooxaha danyarta ah ee la kulma caqabadaha helitaanka iyo ka-qaybgalka waxbarashada, iyadoo jinsiga loo eegayo | In gabdhaha iyo kooxaha nugul gargaar dhaqaale la siiyo. | Waxbarashada Asiasiga ah | WWH&TS |
| 10. Hirgelinta tallaabooyin gaar ah oo lagu difaacayo carruurta iyo ardayda baahiyaha gaarka ah qaba, si gaar ah gabdhaha, si looga ilaaliyo xadgudubka jirka, maskaxda iyo jinsiga. | Jiritaanka tallaabooyin gaar ah iyo hirgelintooda<br><br>Warbixinnada la xiriira xadgudubyada jirka, maskaxda iyo jinsiga ee dugsiyada | Maamulka Booliiska | WWH&TS |